
# Buug Gacmeedka Waalidka ee Nidaamka Sharciga Carruurta

Fahanka iyo Hagida Nidaamka Caddaalada Carruurta ee King County





**Baabi'inta Xabsi Dhigida Carruurta**

King County

**Daabacaada 2020**

## Shaxda Mawduucyada


| Mawduuca | Lambarka Bogga |
|---|---|
| Qariirada Sheekada Baabi'inta Xabsi Dhigida Carruurta (Sawir) | 3 |
| Horudhac | 4 |
| Kawaran haddii aan ahay qof bilaa sharci ah? | 5 |
| Kawaran haddii aanan ku hadlin Ingiriis? | 5 |
| Xirfadlayaasha ka shaqeeya Nidaamka Caddaalada Carruurta (Sawir) | 6 |
| Waaxaha iyo Xirfadlayaasha Nidaamka Caddaalada Carruurta | 7 |
| Waaxaha Booliiska | 7 |
| Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista ee King County | 7 |
| Waaxda Difaaca Bulshada ee King County | 8 |
| Waaxda Caddaalada Carruurta ee Maxkamada Sare ee King County | 8 |
| Marka Carruurtu Ku jiraan Danbi Baaris | 9 |
| Xogta Baarista Danbiga | 9 |
| Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta ee King County | 10 |
| Marka cunugaaga la xiro | 10 |
| Waxa dhacaaya marka cunugaagu soo galo Xabsiga Carruurta | 10 |
| Haddii cunugaaga loo xiray rabshada qoyska: FIRS | 11 |
| Waxa aad samayn karto haddii cunugaagu ku jiro xabsiga | 11 |
| U doodista Xaquuqda Cunugaaga | 12 |
| Maxaa ka dhacaaya Xabsiga Carruurta? | 13-16 |
| Ka waran haddii cunugaygu soo sheego xadgudub ama dayacaad? | 16 |
| Hanaanka Maxkamada | 16-27 |
| Tilmaamaha Booqashada Maxkamada Caddaalada Carruurta | 17 |
| Dhagaysiyada Maxkamada | 17 |
| Hanaanka Maxkamada (Sawir) | 18-19 |
| Dhagaysiga Imaatinka Koobaad | 20 |
| Dhagaysiyada Dheeraadka ah | 21-22 |
| Dhagaysiyada Aan Badanaa Dhicin (Sawir) | 23 |
| Diversions (Wareejinada) | 24 |
| Barnaamijyada iyo Iskaashiyada Taageerada leh ee Maxkamada | 24-27 |
| Jawaabta Caafimaadka Dabeecada | 24 |
| Tababarka Badalida Xanaaqa (ART) | 24 |
| Dhalinta Khatarta Ku jirta (ARY), Carruurta U baahan Adeegyada (CHINS), iyo Barnaamijyada Googoosaysnimada | 24-27 |
| Kooxda Qiimaynta Caddaalada Maxkamada Carruurta (JJAT) | 27 |
| Xarunta Khayraadka Maxkamada Sare ee Carruurta iyo Qoyska | 27 |
| Qaabab kale ee Badalka U ah Xabsiga: Kormeerka Guriga ee Elektarooniga ah iyo Daryeelka Kooxda | 28 |
| Sajalaynta Diiwaannada | 28 |
| Erayada Badanaa La adeegsado | 29-32 |
| Erayada Lasoo Gaabiyay | 33 |
| Ilaha iyo Adeegyada Bulshada | 34-41 |
| Qiraalo | 41 |


King County
ZERO YOUTH DETENTION
Relationship Oriented
Accountability & Transparency
Value Service Providers
Cultivating conditions for young people to be HAPPY, SAFE, HEALTHY and THRIVING
Prioritize Voices of Youth & Families
Quantitative Data
As overall number of youth in detention decreased, racial disproportionality increased
Average daily population in detention: 41.8
Increase in use of electronic monitoring while overall detention decreases
Black youth represent 10% of King County's population, but 50% of the detention population
ALIGN AND OPTIMIZE CONNECTIONS BETWEEN SYSTEMS TO INCREASE EFFECTIVENESS
SCHOOL SYSTEMS
COMMUNITY SERVICES
JUSTICE SYSTEM
PREVENT YOUTH FROM ENTERING THE JUVENILE LEGAL SYSTEM
SUPPORT YOUTH AND FAMILIES TO REDUCE RECURRENCE OF LEGAL SYSTEM OUTCOMES and IMPROVE HEALTH OUTCOMES
DIVERT YOUTH FROM THE FORMAL LEGAL PROCESS and DETENTION to COMMUNITY-BASED OPTIONS
DETAIN
DIVERT
PRISON PIPELINE
"It's easier to get a gun than it is to get a job."
Qualitative Data
Overcoming Historical Barriers
wealth disparities
social determinants of health
educational inequity
LEAD WITH RACIAL EQUITY
Historical Data
war on drugs
mass incarceration
redlining
juvenile justice act
sub-prime lending
DOMINANT CULTURAL VALUES
perfectionism
either/or thinking
linearity
defensiveness
urgency at the expense of relationships
right to comfort
quantity over quality
anti-racism

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahanka tusmadaan, fadlan dib u eegis ku samee adoo kaashanaaya xirfadle kasta oo katirsan nidaamka cadaalada sharciga carruurta ee King County ama la xariir zydinfo@kingcounty.gov. Tusmadaan waxaa lagu heli karaa luuqadaha Amxaari, Af Ruush, Soomaali, Isbaanish, Tigrinya, Marshallese iyo Vietnamese.

# Horudhac

Marka uu ilmo qayb ka yahay nidaamka cadaalada carruurta, xubnaha qoyska ayaa badanaa daalan kadib marka ay waqti badan iyo xoog badan geliyaan helitaanka taageerada ka caawinaysa inay badalaan sababta keentay inay ilmuhu nidaamkaas galo. Ka daryeele ahaan, waxaa laga yaabaa inaad taageero u raadsatay dugsiyada iyo la taliyaasha. Waxaa laga yaabaa inaad niyad jab ka qaaday caqabadaha kaa haysta helitaanka adeegyada. Ayadoon laga eegayn iskudayada aad samaysay si laguu caawiyo, xubnaha qoyska ayaa badanaa naftooda ku eedeeya habdhaqanka cunugooda.

Abuurista bii'o ammaan u ah cunugaaga ayaan ahayn wax kaligaa ku saaran. Waa masuuliyad saaran dhammaan bulshada inay carruurta siiyaan bii'o ay ku kobcaan. Dadka ku jira nidaamka sharciga ayaa kugu xiraaya khayraad kasta, taageerooyin iyo adeegyo si caqabadaan loo joojiyo. In ilmahaagu galo nidaamka sharciga ayaa ah arin khatar ah haddii cunugaaga lagu xukumo danbi, waxay keeni kartaa dhibaatooyin muddo dheer socda.

Tani waa sababta King County ay aad uga shaqaynayso dhisida ururka taageerooyinka bulshada si carruurtu u helaan caawimaaday u baahan yihiin markay u baahan yihiin. Taageerooyinkaan bulshada ayaa raadin doona xalal ka fogaanaaya adeegsiga xabsiga ama in ilmuhu sii maro tallaabooyin kale oo sharci. Daraasaad tobanaan sano la waday ayaa muujinaysa in gelinta carruurta xabsi aysan kordhinayn badqabka dadwaynaha ayna taas badalkeed dhibaato u keenayso carruurta, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda. Waxaan awoodnaa ayna qasab tahay inaan shaqo tan ka fiican qabanaa si carruurta, qoysaska, iyo bulshooyinku u helaan nolol farxad, caafimaad, badqab iyo hormar leh.

Waqti xaadirkaan, ka waalid ahaan, waxaad ku jirtaa xaalad adag oo aad ku raadinayso waxa aad samaynayso marka cunugaaga xabsiga la dhigo. Waxaad su'aalo badan ka qabi kartaa cunugaaga iyo fayaqabkiisa. Cunugaygu ma badqabaa? Aaway cunugaygii hadda? Goorma ayaan cunugayga keeni karaa guriga? Goorma ayaan arki karaa ama la hadli karaa? Maxay tahay inaan sameeyo? Qofkee ayaan isku halayn karaa? Maxaa dhacaaya talaabada xigta?

Buuggaan tilmaamaha waxaa la abuuray xili talaabooyinka kala fogaanshaha bulshada la dhaqan gashay si looga hortago COVID-19. Waa macquul inay jiraan noocyo kaladuwan oo adeegyo, dhagaysiyada maxkamada, iyo booqashada ilmaha xabsiga ku jira ah kuwaas oo aan ku jirin buugaan.

**Buuggaan tusmada ah waxaa abuuray waalidiin iyo dadka u dooda arimaha qoysaska oo doonaaya inay jawaabo ka bixiyaan su'aalahaan. Tusmadaan looguma talagalin inay sharaxaad adag ka bixiso nidaamka caddaalada carruurta. Taas badalkeed, waxaan filaynaa in tusmadaan ay kaa caawin doonto inaad fahanto doorkaaga ku aadan nidaamka ayna kaa caawiso inaad ku xiranto taageerooyin kasta oo aad adigga ama cunugaagu u baahan yahay.**

# Kawaran haddii aan ahay qof bilaa sharci ah?

King County ayaa u taagan soo dhawaynta iyo u adeegida qof kasta ayadoon laga eegayn xaaladooda soo galootinimo. Haajiridu waa khibrad aad u adag korinta carruur aad ku koriso dhaqan cusub ayaana sii kordhinaysa caqabadaha. Ma jiraan waxkamid ah waaxaha dawlada ee King County oo ku waydiinaaya xaaladaada soo galootinimo. Booliiska maxaliga ah wax kaama waydiinayaan xaalada soo galootinimo ee qofka intuu xiran yahay. Xogtaan lama sheego, laguma aruuriyo, ama lama gasho wax kamid ah kaydadka xogta. Haddii cunugaagu uusan haysan sharci, lama tarxiili doono haddii la xiro. Xirfadlayaasha ka shaqeeya nidaamka cadaalada carruurta ee King County ayaa haysta ilaha khayraadka si loogu xiro qoysaska soo galootiga ah khayraadka gaarka ah markay codsadaan. Maaha muhiim in la ogaado dukumiintiyada qoysaska si loo siiyo caawimaadaan.

**Halkaan guji si aad u hesho King County Immigrant and Refugee Program (Barnaamijka Qaxootiga iyo Soo Galootiga ee King County)** ama wac King County Office of Equity and Social Justice (Xafiiska Sinaanta iyo Cadaalada Bulshada ee King County) oo aad ka wacayso (206) 477-7525 ama (206) 263-3434.

# Kawaran haddii aanan ku hadlin Ingiriis?

Dhammaan dadka, ayadoon laga eegayn wadanka ay ka yimaadeen iyo awoodooda luuqada Ingiriisiga, ayaa xaq u leh inay ka qaybgalaan si macno leh dacwadaha maxkamada gobalka iyo barnaamijyada. Kiisaska maxkamada ayaa badanaa aad u nidaamsan, lehna khibrado dhib badan oo u baahan eray bixin gaar ah. Haddii aan taxadar dheeraad ah laga muujin bixinta adeegyada luuqada oo waxtar leh, dad badan ayaa waajihi doona hanaan garsoor oo gelinaaya culaysyo cadaalada ka fog oo sharci daro ku ah awoodooda ku aadan inay si buuxda uga qaybgalaan dacwadaha.


Dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya King County waxay heli karaan adeegga turjumaada khadka taleefanka ee kulanada tooska loo qabto iyo wicitaannada taleefanka. Haddii aad sheegi karto magacaaga, lambarka taleefanka, iyo magaca luuqada aad ku hadasho, shaqaale ka socda King County ayaa wicitaanka kugusoo celin kara asagoo turjumaan la joogo. Haddii aad ku hadasho Ingiriiska laakiin aad doonayso turjumaan, fadlan codso turjumaan siday tahayba. Waxaa fiican inaad ku qanacdo aadna si wacan u fahanto xogta si looga fogaado wareer loona hagaajiyo hanaanka dacwada.

Turjumaanadu waxay kaliya fasiri karaan wadasheekeysiyada si toos ah, kumana siin karaan **difaac** ama waano.

**Turjumaada lagu bixiyo Kulannada Maxkamada**

Waxaad waydiin kartaa qareenkaaga ama **Juvenile Probation Counselor (JPC, La taliyaha Xukunka Maxkamada Carruurta)** helitaanka turjumaan. Shaqaalaha maxkamadu waa inay xaqiijiyaan in turjumaan bilaash ah la heli karo dhammaan munaasabadahaaga maxkamada haddii aad u sheegtay inaad mid u baahan tahay. **Uma baahanaysid inaad la xariirto adeegyada turjumaada si toos ah, laakiin haddii aad su'aalo qabto waxaad ula xariiri kartaa si iskaa ah:** Interpreters for Court Matters (Turjumaannada Arimaha Maxkamada) (206) 477-1415 scinterp@kingcounty.gov.

*Laga bilaabo afka Afghani ilaa Zulu, Superior Court's Office of Interpreter Services (OIS, Adeegyada Turjumaanka ee Xafiiska Maxkamada Sare) ayaa leh turjumaanada in ka badan 160 luuqadood oo kaladuwan si looga caawiyo dadka aan Ingiriiska aqoon fahanka arimaha maxkamada. Adeegyada turjumaada waxaa lagu bixiyaa si bilaash ah dhammaan fadhiyada maxkamada.*


Xirfadlayaasha ka shaqeeya Nidaamka Caddaalada Carruurta
Shaqaalaha Bulshada
Saraakiisha Xabsiga Carruurta
Saraakiisha Booliiska
Kaaliyaasha Sharciga iyo Taqasuslayaasha Dhexdhexaadinta
La taliyaha Muraaqaynta Carruurta
Qareenka Difaaca
Qareenka Dacwad Oogista
Garsoorayaasha
Tusmooyinka Bulshada ee Xarunta Khayraadka
U doodayaasha Dhibanaha

# Waaxaha iyo Xirfadlayaasha Nidaamka Caddaalada Carruurta

Nidaamka cadaalada carruurta ayaa ka kooban waaxaha badan ee King County iyo ururada bulshada ee ay iskaashiga laleedahay. Go'aanada saamaynta ku leh cunugaaga waxaa sameeya dad kaladuwan xiliyo kala duwan oo hanaanka ka mid ah. Waa inaad si joogto ah uga warqabtaa go'aannada la gaaray iyo cidda awooda u leh gaarista go'aankaas. Hadba intaad xog ka hayso xaalada cunugaaga ayaad hagaajin kartaa taageerada aad siinayso. Xaqiiji inaad qorto magaca, darajada, magaca xafiiska, lambarka taleefanka iyo dadka la shaqaynaaya cunugaaga. Waxaa fiicnaan karta inaad haysato hal buug oo ah buuga xasuusta si aad ugu qoroto dhammaan xogtaan oo wadajirta.

Marka lagu daro qeexitaanka hoose, mid kasta oo kamid ah waaxahaan ayaa leh webseet. Fadlan booqo webseetyadaas oo la xariir waax kasta si toos ah si aad u hesho qeexitaannada faahfaahsan ee shaqadooda, doorarkooda, iyo adeegyadooda.

## Waaxaha Booliiska

Haddii cunugaagu xariir la sameeyo sarkaal booliis ah, sarkaalkaan ayaa u shaqayn kara King County Sheriff's Office (Xafiiska Nabadgalyada ee King County), ama waaxda booliiska magaalada maxaliga ah. Marka uu ka falcelinaayo dhacdo, sarkaalka booliiska ayaa qiimaynaaya badqabka xaalada iyo in danbi lagalay iyo in kale. Kadib markuu baaritaan sameeyo, wuxuu go'aaminayaa in cunugaagu qayb ka qaatay danbi. Wuxuu gaari karaa go'aan oo ku xiraayo cunugaaga uuna ugu diraayo xabsi ammaan ah ama inuu gudbiyo **soo jeedin** (warbixinta booliiska) oo loo gudbinaayo **Prosecuting Attorney's Office (PAO, Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista)**.

## Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista ee King County

1211 East Alder St. Seattle, Washington 98122-5553
Saacadaha Xafiisku Shaqeeyo: Isniinta – Jimcada 8:30am illaa 4:30pm
(206) 477-3044

Degmada King County Prosecuting Attorney (Qareenka Dacwad Oogista) waxaa doorta codbixiyaasha. Qareenno dheeraad ah ayaa la shaqaalaysiiyaa si ay uga shaqeeyaan waaxda caddaalada carruurta. Xafiiskoodu waxa uu ku yaalaa **Children and Family Justice Center (CFJC, Xarunta Cadaallada Carruurta iyo Qoyska)**. Marka booliisku xiraan cunugaaga, waxay warbixinta u diraan Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista. Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista ayaa go'aamiya haddii kiiska cunugaaga lagu maarayn karo barnaamij bulsho ama haddii kiiska loo gudbinaayo Court (Maxkamad).

**Qareenka Dacwad Oogista** – Gudaha Maxkamada, shaqada Qareenka Dacwad Oogistu waa inuu caddeeyo in eedaymaha ka dhanka ah cunugaaga ay yihiin kuwo sax ah, inuu difaaco badqabka bulshada, iyo inuu matalo saamaynta arintaan ku yeelanayso dadka dhibanayaasha ah. Wuxuu joogi doonaa dhammaan dhagaysiyada. Mararka qaar, Qareenka Dacwad oogista oo kale ayaa ka qaybgalaaya dhagaysi kasta. Adigga iyo cunugaaga ayaa arki doona qareenka oo jooga maxkamada, illaa in kiiska cunugaagu quseeyo maahee rabshad qoyska ka dhacday.

**Victim Advocate (U doodaha Dhibanaha)** – Victim Advocates (U doodayaasha Dhibanaha) ayaa siiya xog, taageero, iyo adeeg u gudbin shaqsiyaadka uu waxyeelada u gaystay cunuga danbiga ku eedaysan, ayna ku jiraan xubnaha qoysku. (206) 477-3035 iimeelka: vau.juvenile@kingcounty.gov

## [The King County Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadwaynaha ee King County)]

The Dexter Horton Building
710 Second Avenue, Suite 200 Seattle, WA 98104
Saacadaha Xafiisku Shaqeeyo: 8:00am illaa 5:00pm
Taleefoonka: (206) 296-7662 ama si bilaash ah: (844) 935-3534 TTY: 711 Adeegyada dhagoolka iyo Indhoolka

**Defense Attorney (Qareenka Difaaca)** ama **Public Defender (Qareenka Dadwaynaha)** – Haddii cunugaaga lagu eedeeyo danbi, waxaa loo xilsaarayaa qareen (sidoo kale loo yaqaano "difaacaha dadwaynaha"). Shaqada qareenku waa inuu cunugaaga ku matalo maxkamada, inuu cunugaaga siiyo talo sharci uuna ka caawiyo cunugaaga gaarista go'aanada sharciga. Qareenku wuxuu matalaa cunugaaga maaha adigga. Shaqada qareenku waa inuu difaaco waxa cunugaagu go'aansado. Qareenku waa inuu u sharaxaa cunugaaga cawaaqibka ka dhalan kara go'aannada uu cunugaagu gaaro. Qareenka cunugaaga looma ogola inuu kula wadaago adigga xog uusan cunugaagu doonayn in lagula wadaago. Tan waxaa ku jiri kara xog ku saabsan dhacdada lagu eedeeyay, marqaatiyada jiri kara, iyo/ama xog ku saabsan shaqsiyada cunugaaga.

**Mitigation Specialists (Taqasuslayaasha Dhexdhexaadinta)** iyo **Paralegals (Kaaliyaasha Sharciga)** ayaa la shaqaynaaya qareenka difaaca cunugaaga. Shaqadoodu waa inay caawiyaan shaqada qareenka.

## The King County Superior Court Juvenile Division (Waaxda Caddaalada Carruurta ee Maxkamada Sare ee King County)

1211 E. Alder St. Seattle, WA
Main Floor Receptionist (206) 263-8634
8:15am illaa 4:30pm Isniinta illaa Jimcada

Juvenile Court (Maxkamada Carruurta) waa waax kamid ah King County Superior Court (Maxkamada Sare ee King County). Way ka duwan tahay Juvenile Detention (Xabsiga Carruurta), Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadwaynaha) iyo Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista.

### Shaqaalaha Maxkamada Carruurta

Maxkamada ayaa dad shaqaalaysiisa si ay uga shaqeeyaan xarumaha kaladuwan. Shaqsiyaadkaan waxay leeyihiin darajooyin kaladuwan iyo waajibaad kajira xarunta dhexdeeda.

**Garsoorayaasha** – Judges (Garsoorayaashu) waa saraakiil shaqada dawlada loo doorto. Garsoore ayaa masuul ka ah dhagaysi kasta oo maxkamadeed si loo xaqiijiyo in xeerarka sharciga lagu dhaqmo. Garsooraha ayaa go'aaminaaya in cunugaagu danbiga galay ama uusan gelin danbi, wuxuu go'aamiyaa marka cunugaaga xabsiga lagu haynaayo, wuxuuna go'aanshaa waxa cunugaaga lagu amraayo inuu sameeyo si uu u dhamaysto xukunkiisa (sida in dusha lagala soconaayo, **Juvenile Rehabilitation (JR, Baxnaaninta Carruurta Xukunku Ku dhaco)** ama adeegga bulshada). Adigga iyo cunugaaga ayaa kaliya la xariiri doona garsooraha inta lagu jiro dhagaysiga dacwada. Waxaad sidoo kale fursad u heli kartaa fursad aad toos ugula hadasho garsooraha marka aad joogto dhagaysiyada maxkamada ee cunugaaga. Xog kasta oo aad doonayso inaad la wadaagto garsooraha waa inaad u sheegtaa **Juvenile Probation Counselor (JPC, La taliyaha Xukunka Maxkamada Carruurta) ee ku qoraaya.**. JPC ga Ku qoraaya ayaa soo koobaaya xogta ku saabsan cunugaaga kadibna soo jeedino ku aadan dookhyada xalka u diraaya garsooraha.

**Juvenile Probation Counselors** JPCs (La taliyaasha Xukunka Maxkamada Carruurta) ayaa gacan ka gaysanaaya aqoonsiga baahiyaha cunugaaga, ka caawinaaya cunuga inuu raaco amarada garsooraha uuna warbixinta ku cesho garsooraha.

Waxaa jira noocyo kaladuwan oo JPCs ah waxayna qayb ka yihiin xiliyada kaladuwan ee shaqada:

*Screening JPC (Lataliyaha Xukunka Maxkamada ee Baaritaanka)* – Wuxuu waraysi ka qaadaa waalidka/masuulka marka koobaad e cunugaaga la keeno xabsiga.

*Intake JPC (Lataliyaha Qorista)* – Wuxu tallooyin ka siiyaa garsooraha adeegyada xalka ee uu u arko inuu caawinaayo cunugaaga. Haddii aad su'aalo ka qabto hanaanka maxkamada, JPC ga Qorista ayaa ah qofka ugu wanaagsan ee aad la xariirayso. Haddii aad hayso xog aad doonayso in garsooruhu ka oggaado cunugaaga, waa inaad u sheegtaa JPC ga Qorista.

*Supervising JPC (La taliyaha Kormeerka)* – Haddii cunugaagu ku jiro barnaamijka badelka ama lagu xukumay danbi laakiin uusan xabsi ku jirin, waxaa loo xilsaari doonaa JPC ga Kormeerka. JPC ga Kormeerka ayaa ka shaqayn doona xafiiska danbi baarista ee u dhaw guriga cunugaaga.

## Marka Carruurtu Ku jiraan Danbi Baaris

Marka maxkamadu aaminsan tahay in cunugaagu heli karo taageero uu uga baahan yahay bulshada, waxay gelin karaan cunugaaga baaritaan. Inta badan carruurta qirta danbiga ama lagu helo inay galeen danbi ayaa ku dhex jiri doona bulshada ama ka qaybgeli doona qorshaha kiiska baxnaaninta danbiilaha oo uu samaynaayo la taliyaha danbi baarista Maxkamaa carruurtu. Cunugaaga waxaa laga codsan doonaa inuu raaco xeerarka qaar, sida inuu dugsiga aado, waxaana la siin doonaa taageero iyo adeegyo gaar u ah cunugaaga iyo qoyskaaga. Haddii cunugaaga la gasho dabagalka danbiyada, La taliyaha Dabagalka Danbiyada ee Maxkamada Carruurta ayaa kaala shaqayn doonta adigga iyo cunugaaga abuurista qorshaha kiiska oo balaaran oo ay ku jiri karaan waxyaabaha sida la talinta, shaqada, iyo taageerada waxbarashada. Yoolka koobaad ee la taliyaasha dabagalka danbiyadu waa inay taageeraan cunugaaga iyo qoyskaaga inta lagu jiro hanaanka ayagoo bixinaaya khayraad korna u qaadaaya badqabka iyo caafimaadka mustaqbalka.

## Xogta Baarista Danbiga

Haddii aad taqaano la taliyaha kormeerka danbi baarista carruurta, waxaad toos ula xariiri kartaa sarkaalkaas. Haddii aadan aqoon, waxaad wici kartaa xafiiska wayn ee soo dhaweynta si laguugu xiro qofka saxda ah.

**Xafiisyada Danbi Baarista Maxkamada Carruurta**

**Seattle** (City Unit) (206) 477-4929
1211 E. Alder St. Seattle, WA

**Federal Way** (South II) (206) 477-7360
34004 16th Avenue South #104 Bellevue, WA 98003

**Renton** (South I) (206) 477-5335
451 SW 10th Street #200 Renton, WA 98057

**Bellevue** (Northeast Unit) (206) 477-6490
1722 138th Place NE #200 Bellevue, WA 98005

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan doorka JPCs, booqo webseetkaan.

**The King County Department of Adult and Juvenile Detention (DAJD, Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta ee King County)**
1211 E. Alder St. Seattle, WA

Waaxdaan waxay ka shaqaysaa xabsiyada carruurta. Inkastoo ay ku yaalaan isla dhismaha, DAJD waa wax ka duwan Maxkamada Carruurta. Shaqaalaha DAJD waxay la shaqeeyaan carruurta ku jira waaxda caddaalada carruurta ayna ku jiraan kalkaalisooyin diiwana gashan, xirfadlayaasha caafimaadka dhimirka, kaaliyaasha caafimaadka, macalimiin, saraakiisha cadaalada xabsiga carruurta, iskuduwayaasha baxnaaninta cadaalada, taqasuslayaasha tababarka iyo qiimaynta, iskuduwayaasha nasiinada, iskuduwayaasha mutadawacnimada, iyo kormeerayaasha dhaqan celinta.

## Marka cunugaaga la xiro

Haddii booliisku xiraan cunugaaga, waxay cunugaaga u diri karaan guriga, waxaana cunugaaga qasab ku noqon doonto in maalin danbe la keeno maxkamada.

Marar kalana, booliisku waxay xirayaan cunugaaga waxayna dhigayaan xabsi. Booliisku waxay cunugaaga gayn karaan xabsiga sababahaan awgood:

1. Booliiska ayaa aaminsan in cunugaagu galay danbi hubaysan (qori).
2. Booliisku ayaa aaminsan in cunugaagu weeraray shaqaale, maamule, ama macalin.
3. Waxaa jira **warrant (amar maxkamadeed)** oo lagu amray in cunugaaga la xiro.
4. Booliiska ayaa aaminsan in cunugaagu uu u hanjabaayay qof kale ama uu ku jiray xaalad dhibaato u gaysan karta qof kale ama keeni karta waxyeelo wayn oo hantiyeed.
5. Cunugaaga ayaa la xiray marar badan oo hore, booliiska ayaana walaac ka qaba habdhaqankiisa hadda.

Si aad u hesho liiska faahfaahsan ee danbiyada lagu eedeeyo oo keeni kara in booliisku cunugaaga xabsiga dhigaan, ka fiiri Juvenile Detention Intake Criteria (Shuruudaha Xabsi Dhigista Carruurta).

## Waxa dhacaaya marka cunugaagu soo galo Xabsiga Carruurta Marka koobaad

Haddii booliisku cunugaaga xabsiga dhigaan, waxay cunugaaga u wadayaan Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Carruurta iyo Qoyska) oo ku taala 1211 E. Alder St in Seattle.

**Baaritaanka caafimaadka:**
Marka la keeno xabsiga Carruurta, **kalkaaliso** ayaa baaraysa cunugaaga. Haddii shaqaaluhu ay walaac daran ka qabaan caafimaadka ama caafimaadka dhimirka ee cunugaaga, cunugaaga waxaa loo qaadi karaa isbitaal si loo baaro. Haddii aan cunugaagu qabin walaacyo caafimaad oo daran waxaa dib u qiimeyn doonta kalkaaliso markuu soo galo xabsiga amaanka ah.

Marka cunugaaga la dhigo xabsiga, waxa uu heli doonaa daryeel caafimaad iyo adeegyada caafimaadka dhimirka haddii uu u baahdo. Xarunta caafimaadka waxaa laga shaqeeyaa afar iyo labaatanka saac si loola socdo loogana jawaabo baahiyaha carruurta. Kalkaaliso ayaa wacaysa waalidiinta 24 saac gudahood kadib marka cunugaaga la dhigo xabsiga, si loo helo xog dheeraad ah oo ku saabsan taariikhda caafimaadka iyo baahiyaha cunuga, ayna ku jirto in wax laga oggaado daawoyin kasta oo cunugaaga qaadanaayay.

**La hadlida Baaraha:**
Sarkaal booliis ah ama La taliyaha Danbi Baarista Maxkamada Carruurta (**JPC**) ayaa kusoo wacaaya marka cunugaaga la keeno xabsiga. “Screener (Baaraha)” ayaa dhagaysan doona walaacyadaada, ka jawaabi doona su'aalahaaga kaana caawin doono inaad fahanto talaabooyinka xiga. **Kani waa waqti haboon oo aad u doodi karto cunugaaga.** Waxaad la wadaagi kartaa Baraha xogta aad isleedahay waa inuu ka ogaado cunugaaga. Tusaale, haddii cunugaagu qabo naafo ama uu yahay ilmo bilaa hooy ah, waa inaad u sheegtaa Baaraha.

Baaraha ayaa xogtaan la wadaagi doona shaqaalaha ka socda **Xabsiga Carruurta**, **Maxkamada**, **Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista**, iyo **Waaxda Difaaca Dadwaynaha**.

**Cunugaaga ayaa ku jiraaya xabsiga ama la gaynayaa guriga:**
Baaraha ayaa qaadan doona xogta uu kaa helo adigga, cunugaaga, iyo booliiska. Kadibna waxa uu eegi doonaa xeerarka Maxkamada si uu u arko haddii cunugaagu ku jiri karo xabsiga ama uu guriga aadi karo.

Caadiyan, cunugaaga ayaa xabsiga joogaaya haddii:

- Booliiska aaminsan yihiin in cunugaagu galay danbi adag
- Maxkamadu ka walaacsan tahay badqabka dadwaynaha haddii cunugaaga bulshada lagu dhex siidaayo
- Maxkamadu ay ka walaacsan tahay in cunugaagu khatar gelin karo naftiisa
- Maxkamadu ka walaacsan tahay in cunugagau uusan soo xaadiri doonin kullanada danbe

**Tallaabooyinka Xiga:**
Baaraha ayaa kuu sheegaaya waxa dhici doona talaabada xigta ayadoo laga eegaayo xaalada cunugaaga. Haddii cunugaagu uu mar horaba door ku lahaan JOC, markaas JPC ga ayaa kaala shaqayn doona talaabooyinka xiga. Mudada cunugaagu ku jiraayo xabsiga ayaa ku xirnaan doonta xaalada shaqsiga ah ee cunugaaga iyo go'aannada ay gaaraan JPC-yada, garsooraha, iyo qareennada dacwad oogista iyo kan difaacaaya cunuga.

## Haddii cunugaaga loo xiray rabshada qoyska: Family Intervention and Restorative Services Center (FIRS, Xarunta Adeegyada Gacan siinta iyo Baxnaaninta ee Qoyska)

Haddii cunugaaga lagu eedaayo rabshada qoyska oo ka dhan ah qof qoyska kamid ah, wuxuu u qalmi karaa in la geeyo Family Intervention and Restorative Services Center (Xarunta Adeegyada Gacan siinta iyo Baxnaaninta ee Qoyska) halkii lagu hayn lahaa xabsiga. Xarunta FIRS xarun markasta furan oo ay maamulaan urur bulsho oo taqasus u leh barnaamijyada iyo adeegyada carruurta u gacan qaada xubnaha qoyskooda. Haddii cunugaaga laga qoro FIRS, cunugaaga iyo qoyskaaga ayaa heshiis dadban galaaya si looga qaybgasho adeegyada caafimaadka dhimirka oo lagu xalinaayo baahiyaha cunuga. Shaqaalaha FIRS ayaa talo xaalad dajin ah bixinaaya si qaab ammaan ah dib loogu mideeyo cunugaga iyo qoyskiisa. Si bilaash ah, qoysaska ayaa la siinaaya talo bixinta guriga, adeegyada caafimaadka dhimirka, adeegyada daroogada iyo khamriga, iyo Step-Up Program (Barnaamijka Baxnaaninta), kaasoo si gaar ah ugu taqasusay rabshada qoyska ee kuraydа. Xarunta FIRS **maaha** xabsi amaan ah.

Haddii cunugaagu u qalmo FIRS, Baaraha kala doodi doona dookhaan adigga. Cunugaaga ayaa kaliya la gaynayaa FIRS haddii adigga, oo ah waalidka/masuulku, aad aqbasho. Xog badan oo ku saabsan FIRS ka eeg webseetkeeda.

Xarunta FIRS (Xarun carruurta lagu hayo) (206) 474-7373 Kormeeraha Barnaamijka FIRS (206) 477-6528

## Waxa aad samayn karto haddii cunugaagu ku jiro xabsiga

**Iskuday inaad booqato cunugaaga islamarkaba.** Waxaad booqan kartaa illaa saddex jeer asbuucii muddo nus saac ah markiiba. Usoo qaad daawada cunugaaga loo qoray booqashada koobaad. Ma jirto cunto, dhar, lacag, ama agabka shaqsiga ah oo la keeni karo aaga booqashada. Marka koobaad ee waalid ama masuul uu yimaado booqashada, wuxuu imaan karaa markuu doono. Kadib booqashadaas, saacadaha caadiga ah ee booqashada ayaa ah:

3:30pm iyo 9:00pm maalmaha shaqada ee asbuuca
9:00am iyo 2:30pm iyo 3:30pm illaa 9pm maalmaha dhammaadka asbuuca iyo kuwa fasaxa

**Fahan xaquuqda cunugaagu u leeyahay inuu matalo qareen difaacaaya.** Qareenka difaacaaya cunugaaga ayaa matalaaya masaalixda cunugaaga iyo go'aanada. Waxa uu difaaci doonaa cunugaaga in laga siidaayo xabsiga iyo in xukunka laga fududeeyo. **U sheeg cunugaaga inuu runta u sheego qareenkiisa difaacaaya.**

**Booliiska ayaa su'aalo waydiin doona cunugaaga kahor iyo kadib marka la xiro.** Gudaha King County, booliisku ma waraysan karaan ilmo ku jira xabsiga carruurta ayadoon qareenka difaacaaya ilmuhu uusan la joogin. Cunugaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu aamusnaado uuna dalbado in adigga iyo qareen timaadaan, sidoo kale, inta lagu jiro waraysiga looga qaadaayo xabsiga carruurta.

**Degdeg ugusoo celi wicitaanka taleefanada kusoo garaaca.** Haddii aadan haysan lambarka taleefanka oo shaqaynaaya, sii Maxkamada iyo qareenka difaaca lambarka saaxiib aad ku kalsoon tahay ama xubin qoyska kamid ah. Kusoo celi wicitaano kasta sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodo oo reeb fariimo aad ku sheegayso magacaaga iyo lambarka lagaasoo wici karo. Waxaad sidoo kale adeegsan kartaa iimeel.

## U doodista Xaquuqda Cunugaaga

Inaad la joogto aadna taageero cunugaaga ayaa muhiim ah marka cunugaaga lagu eedeeyo inuu sharciga jabiyay. Cunugaagu uu waxyeelo kuu gaystay adigga ama qof kale oo qoyska kamid ah ayna u muuqan karto in dabeecada cunugaagu dhaaftay heerkii aad maamuli kartay. Tani waxay fursad u noqon kartaa cunugaaga inuu helo caawimaada uu u baahan yahay dib u dhisida xariirkaaga iyo inaad kor u qaado jihaynta nolosha qoyskaaga. Waxa uu u baahan karaa fursado badan ood wax ku barato iyo, inta lagu jiro hanaankaan, wuxuu u baahan yahay xariirada qof wayn oo daryeel iyo taageero ka siiya noloshiisa. Haddii aadan la joogi karin, nidaamka ayaa sidoo kale ku shaqaynaaya dadka kale ee waawayn ood shaqadaa u xilsaarato asagoo wakiil kaa ah.

**Haddii cunugaagu naafo yahay:** Cunugaagu wuxuu xaquuq sharci ah u leeyahay in lagu baxnaaniyo xabsiga, Maxkamada iyo dugsiga. Haddii cunugaaga laga helay naafo, waxaad codsan kartaa adeegyo gaar ah oo lagu siiyo xarunta xabsiga carruurta, dugsiga iyo Maxkamada. CFJC ayaa buuxinaysa shuruudaha Americans with Disabilities Act (ADA, Sharciga Ameerikaanka Naafada ah).

**Haddii cunugaagu yahay gabadh qaniisad ah, wiil qaniis ah, labeebshe ah, nimoow naag ah, ama wiil naag iska yeel ah:** Xirfadlayaasha ka shaqeeya waaxaha kaladuwan ee King County ayaa qaatay tababar gaar ah oo ku aadan inay u shaqeeyaan carruurta LGBTQ (Qaniisiinta) ah. Hadba xogta ay ka hayaan aqoonsiga cunugaaga intay le'eg tahay, ayay awood dheeraad ah u yeelan doonaan buuxinta baahiyhiisa. Xabsiga carruurta, dhalinta ayaa lagu kala qaybiyaa si ku salaysan aqoonsigooda jinsi. Xog dheeraad ah halkaan ka akhri.

**Codso waxa aad u baahan tahay:** Marka waalidiintu haystaan cunug dacwad uga furan tahay nidaamka sharciga, waxay u baahan yihiin taageero badan, sida inay waqti ka qaataan shaqada, talo bixin, waano, khayraad, iyo daryeelka carruurta. Maxkamadu waxay doonaysaa inaad ka qaybgasho waxayna samayn doontaa intii karaankeed ah si ay u xaqiijiso inaad ka qaybgasho. Tani waxay noqon kartaa fursad aad ku hesho adeegyada qoyskaaga ama

carruurtaadu u baahnaayeen. Xaqiiji inaad u sheegto xirfadlayaasha qaybta ka ah marka aad dhibaato ku qabto buuxinta baahiyahaaga (sida hooyga, cuntada, dharka) ama tagista kulanada. Waxay kaa caawin doonaan inay kugu hagaan khayraadka ay og yihiin inay jiraan iyo inay kaala hadlaan dookhyadaada. Hadba intay fahan fiican ka helaan baahiyahaaga xirfadlayaashu, ayay awoodi doonaan inay ku caawiyaan.

**Ahoow qof nidaamsan:** Hanaanka sharciga ayaa noqon kara mid aad loogu wareero. Dad badan ayaa kulasoo xariiri doona kuwaas oo doonaaya inay ku caawiyaan waxayna lahaan doonaan doorar kaladuwan. Dadka qaybta ka ah hanaanka ayaa isbadeli doona ayadoo ku xiran xaalada jirta. Xaqiiji inaad qorto magaca, darajada, magaca xafiiska, lambarka taleefanka iyo dadka la shaqaynaaya cunugaaga. Waxaa fiicnaan karta inaad haysato boogga xasuusta oo hal ah si aad ugu qoroto dhammaan xogtaan oo wadajirta. Hayso sanduuqa buuggaan xasuus qorka si aad ugu ridato dhammaan dukumiintiyadaada. Codso xog si qoraal ah iyo qaababka kuugu fudud adigga inaad fahanto.

**Waydii su'aalo:** Nidaamka sharcigu waa mid dhib badan! Waa wax caadi ah inaad qabto su'aalo badan aadna na waydiiso su'aalo iskumid ah marar badan haddii aad iloowdo ama fahmi waydo. Haddii aan xirfadluhu aqoon jawaabta su'aashaada, waxay kugu hagi karaan qof yaqaana.

**Ka qaybgal oo soo xaadiri xili ku habboon kulannada iyo dhagaysiyada Maxkamada:** Haddii aadan imaan karin waqtiga ama aad ogtahay inaad soo daahi doonto, wac qofka ama xafiiska dadka aad la kulmayso. U sheeg xirfadlayaasha xaaladaada shaqada iyo saacadaha si ay kuusoo wacaan marka lagu heli karo.

**U dabaaldeg dhammaan go'aannada ku saabsan cunugaaga:** Xaadir ahoow markasta oo macquul ah. Inkastoo ay u muuqan karto wax xun oo cabsi leh, ka hadal kulanada si aad fikir uga dhiibato baahiyaha cunugaaga. Ha is oran in dadku yaqaanaan ama sheegayaan xogta. Mararka qaar, xirfadlayaasha sharciga ayaa ka mamnuucaaya inay xogta wadaagaan.

**Soo xaadir maxkamada:** U diyaar garoow inaad soo xaadirto maxkamada adoo u doodaaya naftaada ama ku daraaya xog aad isleedahay waa muhiim. Fikirkaaga ayaa ka duwanaan kara kan qareennada ama la taliyaasha danbi baarista. Waa muhiim in fikirkaaga la qadariyo. Waxaad usoo wadan kartaa qof wayn oo aad ku kalsoon tahay ama xubnaha qoyska si ay kuu taageeraan.

**La lahoow xariir qadarin ku dhisan dadka qaybta ka ah kiiska cunugaaga:** Ayadoon laga eegayn sida aad u arki karto xaalada cunugaaga ama xirfadlayaasha shaqsiga ah, waa inaad mar kasta u hadasha si qadarin ku jirto. Haddii aad dareemayso xushmad daro ama aaminsan tahay in si caddaalad daro ah laguula dhaqmay, la xariir kormeeraha qofka falkaas ku kacay. Hanaanka ayaa noqon kara mid walaac badan mararka qaar, awoodaada dhisida xariiro ayaana ku caawin karta adigga iyo cunugaaga. Waa muhiim inaad taageero raadsato markaad u baahan tahay aadna su'aalo waydiiso dadka.

## Maxaa ka dhacaaya Xabsiga Carruurta?

1211 E. Alder St Seattle, WA

Xabsigu waa dhisme xiran oo ay maamusho King County Department of Adult and Juvenile Detention (DAJD, Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta ee King County). Cunugaaga ayaa ku jiri kara xabsi marka uu sugaayo dhagaysiyada maxkamada ama uu qaadanaayo xukun lagu riday. Gelista xabsi ayaa noqon karta xasuus cabsi leh waxayna cabsi gaar ah sii yeelan kartaa marka aadan aqoon waxa dhici doona. Xarumaha xabsiyada carruurta ayay tahay inay raacaan xeerarka ku aadan badqabka, booska, caafimaadka iyo nasiinada.

Haddii cunugaaga la gasho xabsi, shaqaalaha xabsiga ayaa haynaaya dharkiisa iyo alaabihiisa shaqsiga ah oo loo gelinaayo kayd. Shaqaalaha ayaa baaraaya cunugaaga si loo xaqiijiyo inuusan keenin alaabo mamnuuc ah. Cunugaaga ayaa qubaysanaaya kadib shaqaalaha ayaa siinaaya sad dhar ah oo nadiif ah. Dharka waxaa ku jira funaanad, feeragashi, surwaalo, buumo, sigisaan, iyo joog dacas ah. Shaqaalaha ayaa sidoo kale siinaaya

cunugaaga sad go'yaal iyo bustayaal nadiif ah. Cunugaaga waxaa loo xirayaa jijinta ammaanka oo xog lagu aqoonsan karo ku taalo. Shaqaalaha caafimaadka ayaa waraysan doona cunugaaga kuna samayn doona baaritaanka jirka iyo caafimaadka dhimirka. Shaqaalaha xabsigu kama baari doonaan cunugaaga daroogo intuu ku jiro xabsiga, laakiin Baarista Maxkamada Carruurta ee Maxkamada sare ayaa ka baari kara.

Talaabada xigta, cunugaaga ayaa la kulmaaya Orientation and Assessment Specialist (Khabiirka Tababarka iyo Qiimaynta) kaasoo waraysi ka qaadaaya cunugaaga, u sharaxaaya xaquuqdiida, xeerarka, waxa uu filan karo, kadibna go'aaminaaya hooyga ugu amaansan ee lagu noolaado ee cunugaaga si uu ugu noolaado ayadoo laga eegaayo aqoonsigiisa jinsiga, da'da, xajmigiisa jireed, iyo taariikhda kale, sida inuu danbiyo hore soo maray iyo dabeecadiisa hore.

Badqabka cunugaaga (jirka, dareenka, iyo galmada) ayaa ah muhiimada koobaad ee shaqaalaha xabsiga carruurta. Haddii cunug kale oo ku jira xabsiga uu khatar ku yahay fayaqabka ama badqabka cunugaaga, shaqaalaha xabsiga carruurta ayaa xalinaaya. Shaqaalaha xabsiga carruurtu ma sitaan hub nooc uu yahayba mana adeegsadaan ciqaab jireed, dhibaatayn, hanjabaado, waxyeelo, ama bahdilaad. Haddii dagaal jiro, shaqaalaha ayaa loo tababaray inay adeegsadaan farsamooyinka xalinta rabshada kahor intaysan adeegsan xanibid ama xoog. Si loo dhawro badqabka qof kasta, Xabsiga Carruurta ayaa leh higsiyada soo socda ee dabeecada:

- In carruurtu dhigtaan dhammaan casharada dugsiga
- Inuu ka qaybgalo si wanaagsan barnaamijyada kale
- Inuu siiyo dadka kale qadarin
- Inuu la qabsado dadka kale
- Inaad cid kale gacantaada u qaadin
- Adeegso luuqad taageero leh
- Samee waxa shaqaaluhu kugu amraan
- Si wanaagsan oo dhakhso ah u jawaab
- Adeegso luuqad qadarin leh
- Dhawr nadaafada adoo qubaysanaaya maalin kasta
- Nadiifi guriga adoo diyaarinaaya sariirta, fogaynaaya qashinka, oo nidaaminaaya alaabtaada

Marka carruurtu buuxiyaan dabeecadaha laga doonaayo, waxay awoodaan inay qaataan maalin kasta "xidigo" kuwaas oo loo adeegsan karo in lagu iibsado cuntooyin fudud oo gaar ah, caariyaysiga qalabka lagu dhagaysto MP3, iyo kabaha cusub ee jiimka. Waxaa intaas dheer, marka carruurtu qaataan tirada ugu yar ee xidigaha maalin kasta, waxay helayaan shaqooyinka heerka sharfida, waqtiga gaymka muuqaalka ah, ama helitaanka dookhyada cuntada fudud oo qiimo jaban.

Haddii dabeecada ilmuhu khatar ku tahay badqabka, waxaa la siinayaa fursad uu uga qaybgalo farsamooyin soo kabasho ah sida xalinta caqabadaha asagoo kaashanaaya ilmo asaagiis ah ama qoraaya waraaq raali gelin ah. Ilmaha ayaa sidoo kale lumin kara faa'iidooyin sida xiliga hurdada oo loo dheerayn jiray ama “honor level status (aqoonsiga heerka sharfida)”. Haddii cunugu sameeyo dabeecad sida dhibaatayn, burburinta hanti, ama weerar jireed ama galmo, waxa uu waqtiga barnaamijka ku qaadan karaa Restoration Hall (Hoolka Baxnaaninta). Carruurta ku jira Hoolka Baxnaaninta ayaa dhigta dugsiga ama ka qaybgala barnaamijyada gaarka ah si ay u bartaan xirfado cusub sida dajinta xaalada, maareynta xanaaqa, ama maamulida dareenka.

Haddii ilmuhu dareemaayo in xaquuqdiisa lagu xadgudbaayo, waxaa lagu boorinayaa inuu degdeg u gudbiyo **grievance (cabasho)**. Kormeerayaasha Xabsiga ayaa akhrinaaya dhammaan cabashooyinka, baaraaya, kadibna jawaab ka bixinaaya 24 saacadood gudahood. Cabashooyinku waa kuwo qarsoodi ah. Waxaa jira saddex bokis oo ay ku jiraan foomamka cabashada oo ku yaala maktabada, jiimka, iyo xarunta caafimaadka oo cabashooyinka lagu gudbin karo. Shaqaalaha ayaa bokiska ka fiirinaaya cabashooyin cusub habayn kasta.

Xabsiga ammaanka ah wuxuu leeyahay **xarun caafimaad** oo leh kalkaaliso waqti buuxa shaqaysa saacad kasta taasoo diyaar u ah inay baarto ayna daawayso xanuunada ama dhaawacyada. Haddii cunugaaga wax gaaraan ama jiran yahay, kalkaalisada ayaa u gudbin karta cunugaaga dhakhtar caafimaad ama go'aamin karta in la dhigo isbitaal. Gudaha Gobalka Washington, carruurta ayaa ogolaan kara in la siiyo adeegyada caafimaadka qaarkood ayagoo oggolaansho ka qaadan masuul. Haddii cunugaagu qaadanaayo wax daawooyin ah wuxuu ka qaadan kalkaalisada intuu ku jiro xabsiga. Waxaa sidoo kale jira shaqaalaha caafimaadka dhimirka oo diyaar u ah inay la kulmaan cunugaaga, haddii cunugaagu codsado, ama haddii shaqaaluhu arko habdhaqan walaac leh (tusaale, in cunugaagu ku hanjabaayo inuu isdilaayo). Shaqaalaha caafimaadka dhimirka ayaa taageeri kara kalaguurka cunugaaga oo la gelinaayo xabsi amaan ah oona aqoonsanaaya baahi kasta oo ku aadan adeegyada caafimaadka dhimirka oo joogto ah. Haddii cunugaagu uu qaadanaayo adeegyada caafimaadka dhimirka kahor intuusan soo gelin Xabsiga fadlan u sheeg adeeg bixiyaasha caafimaadka ama caafimaadka dhimirka xogtaan. Adeegyada caafimaadka dhimirka waxaa bixisa University of Washington Department of Psychiatry and Behavioral Sciences (Waaxda Dhimirka iyo Cilmiga Dabeecada).

**Tusaalaha Jadwalka Xabsiga:**

| | |
|---|---|
| Quraacda/U diyaar garoowga Dugsiga | 8:00am – 8:30am |
| Dugsiga | 8:30am – 11:20am |
| Qadada iyo Qubayska | 11:50 am – 12:35 pm |
| Dugsiga | 12:45pm – 2:45pm |
| Isbadelka Shaqaalaha | 2:30pm - 3:30pm |
| Barnaamijka/Jiimka | 3:30pm – 5:00 pm |
| Cashada iyo Qubayska | 5:00 pm – 5:45 pm |
| Barnaamijka/Jiimka | 5:45 pm – 8:00 pm |
| Xiliga hurdada | 8:00pm - 10:00pm |

Carruurta ku jira xabsiga ammaanka ah waxay ka qaybgalaan dugsiga maalin kasta waxaana dugsiga bixiya Seattle Public School's Interagency Academy (Machadka Isdhexgalka ee Dugsiga Dadwayanahe ee Seattle). Waxay qaataan casharo ku aadan akhriska, farshaxanka luuqada, xisaabaadka, sayniska, iyo xirfadaha nolosha oo ku haboon da'dooda, hormarkooda dugsiga ee bulshada, iyo heerkooda hore ee guusha. Casharada waxbarashada gaarka ah ayaa la heli karaa haddii loo baahdo. Carruurta ayaa sidoo kale ka shaqayn kara hormarinta G.E.D, (Kobaca Guud ee Waxbarashada) gooda intay dhiganayaan dugsiga xabsiga. Casharadu waa qasab.

King County Library System (Nidaamka Maktabada ee King County) ayaa **maktabad** ammaan ah ku leh xabsiga. Dhammaan carruurta ayaa adeegsan kara maktabada maalmo gaar ah si ay ugu sameeyaan shaqooyinka cilmi baarista ama ay usoo qaataan una akhriyaan buugaagta xiliga nasashada.

Waxaa sidoo kale jira Chaplaincy Program (Barnaamij Baxnaanin) kaasoo siiya hagid iyo waano diimeed carruurta haddii ay doonayaan inay la hadlaan Hanuuniye. Adeegyada diinta ee Kiristaanka iyo Islaamka ayaa la bixiyaa haddii carruurtu ay doonayaan inay ka qaybgalaan.

Waxaa jira ururo badan oo maxali ah oo baxsha barnaamijyo dheeraad ah gudaha xabsiga. Tusaalayaasha barnaamijyadaan waxaa ku jira: Yoogada, gabay, shaqooyinka fanka iyo farshaxanka, wax qoris hal abuur leh, hanuunin, shaqooyinka gacan ku samayska, habaynada filinka, shaqooyinka filin samaynta, sheekooyinka codka ah, Kullanada AA, casharada farshaxanka muuqda, xarumaha caafimaadka iyo kaamamka kubada kolleyga, casharada jiimka ee baxnaaninta dadka naxdinta soo maray, beerista, kulanka nabad abuurida, iyo adeegyo kale.

**Baaritaanka Xabsiga** (206) 263-9595 (24 saacadood maalintii / 7 maalmood asbuucii)
Wac baaritaanka xabsiga haddii cunugaaga la xiro aadna u baahan tahay inaad ogaato xaalada xabsiga cunugaaga iyo taariikhda iyo waqtiga dhagaysiga xiga.

**Baaritaanka Xabsiga)** (206) 477-9890 (24 saacadood maalintii / 7 maalmood asbuucii)
Wixii xog kale ah oo ku saabsan xabsiga.

**Xarunta Caafimaadka** (206) 477-9928

## Ka waran haddii cunugaygu soo sheego xadgudub ama dayacaad?

Inta badan dadka waawayn ee la shaqeeya carruurta, sida macalimiinta, la taliyaasha, shaqaalaha bulshada, maareeyaasha kiiska, u doodayaasha, iwm, ayaa ah **mandated reporters (wariyaal qasban)** (marka laga reebo **defenders**). Tani waxay ka dhigan tahay in haddii cunugaagu u sheego in xadgudub loo gaysanaayay, ama cunug kale xadgudub loo gaysto, qofkaan wayn waxaa qasab ku ah inuu u sheego **Child Protective Services (CPS, Adeegyada Difaaca Carruurta)** which is operated by the Washington Statekuwaas oo ay maamusho Washington State **Department of Children Youth and Families (DCYF, Waaxda Carruurta iyo Dhalinta iyo Qoysaska ee Gobolka Washington)**. Waa wax ku badan carruurta inay xogtaan la wadaagaan xirfadlayaasha ku jira nidaamka sharciga.

Wariyaha qasban waxaa qasab ku ah inuu u sheego CPS, xataa haddii uusan fasax uga haysan cunuga ama qofka wayn. Haddii aysan soo sheegin, waxa uu lumin karaa shaqadiisa ama waa la xiri karaa. Wariyaha qasban waa inuusan adeegsan fikirkiisa shaqsiga ah. Haddii ilmo sheego in lagu xadgudbay wariyaha qasban waa inuu u sheegaa CPS. CPS ka ayaa go'aansanaaya waxa la samaynaayo talaabada xigta.

Marka CPS ku helo warbixinta xadgudubka, waxay ku bilaabayaan warbixin ay heli karaan shaqaalaha CPS mustaqbalka. Waxay hubin doonaan warbixinada xadgudubka xiliyo hore dhacay. Kadibna, waxay go'aansan karaan in baaritaan la samaynaayo iyo in kale. Haddii ay sameeyaan baaritaan, waxay waraysanayaan cunuga iyo dadka kale ee xogta ka hayn kara. Waxay go'aansanayaan haddii ilmaha ama dadka kale ee qoysku u baahan yihiin taageero dheeraad ah. Waxay la hadli karaan booliiska. Waxay sidoo kale go'aansan karaan in qoyska iyo cunugu aysan u baahnayn taageero.

Haddii CPS uu go'aansho in qoysku taageero u baahan yahay, shaqaalaha Waaxda Carruurta iyo Dhalinta iyo Qoysaska ayaa taageerada bixin doonta. Inta badan waqtiga, waxay la kulmaan waalidiinta/masuuliyiinta, waxay abuuraan qorshayaal ku saabsan waxa waalidiinta/masuuliyiintu ay tahay inay sameeyaan si ay u dhawraan badqabka ilmaha ayna dabagal ugu sameeyaan waalidiinta/masuuliyiinta si loo xaqiijiyo inay sameeyaan. DCYF ayaa caawimaad siin karta, sida baxnaaninta qoyska ama ku xirista adeegyada kale ee bulshada sida guriyeynta, cuntada, ama caawimaad ku aadan helitaanka shaqo.

Mararka qaar, DCYF ayaa kala saaraysa qoysaska. Marka ay suurtagalayso, waxay kala shaqeeyaan waalidiinta inay helaan goob ammaan ah oo ilmuhu la joogi karo qof ehel ah oo u dhaw. Badanaa, qoysaska waxaa la kala fogeeyaa kaliya maalmo kooban. Tan waxaa loo sameeyaa si la iskugu dayo in lagu difaaco carruurta aadka u yaryar, loona xaqiijiyo in talaabada ugu dhakhsiyaha badan ay qaadaan xubnaha qoysku. Haddii DCYF ay aaminsan tahay in ilmuhu u baahan yahay in laga fogeeyo qoyskiisa muddo ka badan 3 maalmood, waa inay maraan dhagaysiga maxkamada. Marar dhif ah, carruurta ayaa laga fogeeyaa qoysaskooda muddo dheer. Arintaan ayaa dhacda marka ay jiraan xaalado daran xadgudub ama dayacaad, marka xubnaha qoysku aysan awoodin inay bii'o amaan ah siiyaan carruurtooda. Caadiyan, carruurta ayaa kaliya laga fogeeyaa qoyskooda muddo dheer kadib marka iskudayo badan la sameeyay si loo taageero qoyska.

Wixii xog dheeraad ah, fadlan booqo https://www.atg.wa.gov/child-abuse-neglect

**Si aad usoo sheegto xadgudub ama dayacaad loo gaystay ilmo yaryar** (866) END-HARM.

# HANAANKA MAXKAMADA

## Tilmaamaha Booqashada Maxkamada Caddaalada Carruurta

Maxkamada ayaa u furan dhagaysiyada laga bilaabo 8:30am illaa 4:30pm

Waxaad usoo wadan kartaa saaxiibo ama xubnaha qoyska si ay kuu taageeraan. Waxaa jirta meel loogu talagalay daryeelka carruurta in lagu bixiyo inta aad u joogtaan arimaha Maxkamada. Fadlan waydii Maxkamada si aad u hubiso in adeegga aad u heli karto buuxinta baahiyahaaga.

**Tilmaamaha:**Halkaan guji si aad u hesho Qariiradaha Google ka ama halkaan guji si aad u hesho King County Metro's Online Trip Planner

**Baakinka:** Waxaa jira baakin bilaash ah oo goobtu leedahay looguna talagalay martida. Haddii aad ku baakimato jidka, xaqiiji inaad hubiso inaad ku baakimatay aaga baakinka 2 da saac.

**Markaad timaado** xarunta, waxaad soo maraysaa aalada biraha sheegta. Waa inaad soo martaa shaqaalaha adeegyada Maxkamada oo jooga miiska xogta marka aad soo gasho si aad ugu sheegto shaqaalaha ka shaqaynaaya kiiska cunugaaga inaad dhismaha soo gashay. Kahor dhagaysiga, cunugaaga ayaa fursad u heli doona inuu la kulmo qareenka difaaca iyo, haddii uu kamid yahay, **JPC** iyo **u doodaha dhibanaha**.

**U diyaar garoow inaad sugto:** Waxaad sugi kartaa saacado kaladuwan kahor inta aan lagaaga yeerin Maxkamada. Maqaayad ayaa ku taala dabaqa labaad oo aad ka helayso kafee, cunto fudud iyo cunto diyaarsan. Waxaa sidoo kale yaala mashiinka lacagta lagu bixiyo ood ka iibsan karo cuntooyin fudud iyo cabitaano dabaqa koobaad. Waxaa sidoo kale jira maqaayado badan oo aaga ka dhaw.

**Labiska:** Uma baahnid in aad labisato! Haddii aad u baahan tahay ilaha dharka laga helo, fadlan nagasoo wac lambarka (206) 263-8634.

**Hubka:** Hubka lagama ogola maxkamada, ayna ku jiraan qoryaha, mindiyaha, agabka, iyo alaabaha hubka loo adeegsan karo. Qof kasta oo soo galaaya maxkamada waa inuu maraa aalada biraha sheegta. Haddii sheey abuuraaya walaac badbaado ay helaan shaqaalaha nabadgalyadu, way kuu hayn doonaan sheeyga waadna qaadan kartaa markale markaad ka baxdo dhismaha.

## Dhagaysiyada Maxkamada

### Qofka Jooga Xafiiska Soo dhawaynta ee Dabaqa koobaad ee Qolka Maxkamada Carruurta (206) 477-2902

Court hearing (dhagaysiga maxkamada) waa kulan aad la qaadanayso garsoore.

Hanaanka maxkamada carruurta ayaa qaadan kara dhawr asbuuc ilaa dhawr bilood. Waxaa jira dhagaysiyo badan oo aad ka qaybgalayso, ayadoo ku xirana jadwalaynta iyo sababo kale, dhagaysiyadaan ayaa dhici kara muddooyin asbuucyo iskujira. Waxaad heli doontaa waraaq laguugusoo diraayo boostada oo ay ku qoran yihiin eedaymaha loo haysto cunugaaga iyo taariikhda maxkamada lasoo taagaayo. Aad ayay muhiim u tahay in Maxkamada iyo Waaxda Difaaca Dadwaynaha (DPD) ay hayaan ciwaanka boostada ay kaalasoo xariiri karaan. Haddii aadan haysan guri rasmi ah, sii ciwaanka saaxiib ama xubin qoyskaaga kamid ah.

Waydii qareenka difaacaaya cunugaaga haddii cunugaagu u baahan yahay inuu yimaado dhagaysi kasta. Haddii aysan qasab ahayn in cunugaagu kuu yimaado, qareenka difaacaaya cunugaaga ayaa kuu sheegaaya taariikhda xigta ee laga doonaayo inuu maxkamada yimaado. Badanaa, JPC ga cunugaaga ayaa mudayn doona kulan isla waqtiga taariikhda dhagaysiga, si loo xaqiijiyo in la waydiiyo la taliyaha dacwada cunugaaga inuu balan leeyahay iyo in kale.


1
Dhagaysiga Imaatinka Koobaad
Kulanka koobaad ee aad garsooraha la galayso
Qareennada Dacwad oogista iyo Difaaca ayaa sheegaaya mawqifkooda iyo sababta
Hooyga carruurta
Xabsi la waardiyeeyo
Muraaqabada Elektarooniga ah
La shaaciyay
Waalidka, masuulka, ama goyska
Leh shuruudo gaar ah
"Aan guriga aadno"
Haa
Gudbi
Eedaymo
Maya
2
Dhagaysiga Shaacinta Eedaymaha
Garsooraha ayaa kuu sheegaaya waxa lagu eedeeyey cunugaaga
HANAANKA MAXKAMADA
3
Dookhyada qaar ee macquulka ah
Dajinta Kiiska
Kala hadlaaya kiiska kadibna TALO siinaaya cunugaaga
Dib u dhigaaya kiiska si loo diyaar garoobo
Galaaya dacwad qaadis
Qirashada danbiga
4
Dhagaysiga Maxkamadaynta/ Xaqiiqo raadinta
Bisha
La fasaxay
Garsooraha ayaa go'aaminaaya
Aan danbi lahayn
Danbiile ah
5
Dhagaysiga Heshiiska/ Codsiga
Garsooraha ayaa xukunka ridaaya:
Muraaqabayn
Magdhaw
Muddo Xabsi
Tallaabooyinka Xiga
La taliyaha Muraaqaynta Carruurta
Shaqaalaha Muraaqabada Elektarooniga ah

Qof kasta wuxuu lahaan doonaa khibrad gaar ah; mararka qaar labo ama ka badan oo dhagaysi ayaa dhici kara inta lagu jiro soo xaadirida maxkamada. Marar kale, dhagaysi kasta waxa uu dhacayaa maalin gaar ah. Dhagaysiyada qaar baa ka dhaca qolka maxkamada halka qaarna ka dhacaan qolka sugitaanka. Sabab la xariirta in dhagaysiga maxkamadu si degdeg ah u dhici karo, waa fikir wanaagsan inaad qorto su'aalahaaga si aad u xasuusato inaad waydiiso qareenka difaacaaya cunugaaga ama la taliyaha qorista dacwada xog ku saabsan ayaga xili danbe.

## Dhagaysiga Imaatinka Koobaad

First appearance hearings (Dhagaysiyada imaatinka koobaad) waxay dhacaan maalin kadib marka cunugaaga la xiro. **JPC** ama **qareenka difaaca ee DPD** ayaa kusoo wacaaya si uu kuugu sheego xiliga aad soo xaadirayso dhagaysiga. Haddii aadan awoodin inaad toos u timaado, waxaad uga qaybgeli kartaa taleefanka.

**Inta lagu jiro dhagaysiga** ma awoodi doontid inaad la hadasho cunugaaga. Qareenka dacwad oogaha iyo qareenka difaacaaya cunugaaga ayaa u sheegaaya garsooraha mawqifkooda ku aadan arinta iyo sababta ay mawqifkaas u qabaan. Garsooraha ayaa codsan kara inaad hadasho. Waxaa habboon inaad isdiyaariso adoo sii qoranaaya qodobada muhiimka ah ee ku saabsan waxa aad doonayso inaad sheegto. Soo koob si erayadaadu u yeeshaan awood badan.

**Marka la joogo dhagaysiga,** garsooraha ayaa go'aaminaaya in cunugaaga la siidaynaayo ama uu kusii jiraayo xabsiga. Garsooraha ayaa gaaraaya go'aankaan oo lagu saleeyay eedaymaha ka dhanka ah cunugaaga, khatarta badqab ee ku dhici karta cunugaaga ama dadka kale, iyo taariikhda cunugaagu kasoo maray nidaamka sharciga. Waa kan waxa garsooruhu go'aamin karo in lagu sameeyo cunugaaga:

1. Haddii garsooruhu qabo walaacyo la xariira badqabka oo ku aadan cunugaaga, ama walaacyo ku aadan inaan cunugaagu imaan doonin taariikhda dhagaysiga xiga, waxa uu amrayaa in cunugaaga lagu hayo xabsi amaan ah.
2. In laguu siidaayo si aad cunugaaga ugu wadato guriga
3. In loo dhiibo xubin qoyska ah marka aad ogolaato
4. In lagu siidaayo shuruudo gaar ah (sida inuusan gelin danbiyo ama uusan wax xariir ah la samayn dad gaar ah) ilaa in “probable cause (sabab macquul ah)” la helo maahee
5. In loo diro xarunta carruurta haddii aad walaacyo dhanka badqabka ah ka qabto in cunugaagu joogo guriga
6. In la siidaayo asagoo **Electronic Home Monitoring (EHM, Qalabka Kormeerka Guriga ee Korontada ku shaqeeya)** looga xiray anqawga

Kadib dhagaysiga waxaa lagugu amri doonaa inaad la kulanto JPC ama, haddii cunugaaga lagu xiray qalabka korontada ee muraaqaybta guriga, waxaad la kulmaysaa shaqaale ka socda **EHM (ASD)** . Waxay kaala hadli doonaan talaabooyinka xiga. Waxaa haboon inaad la kulanto waxyar kadib marka dhagaysigu dhaco si aadan u gelin safar kale oo aad ku timaado maxkamada. Haddii aad u baahan tahay inaad baxdo isla marka dhagaysiga maxkamadu dhamaado, ugu yaraan soo mar si aad u qaadato xogta aad ka wacayso oo kasoo qaado la taliyaha dacwada ama shaqaalaha EHM si aad balan u qabsato. Way ku sugayaan.

Qareenka dacwada ayaa go'aamin doona haddii uu doonaayo inuu dacwad ka keeno cunugaaga. Haddii uusan eedaymo kusoo oogin, adigga iyo cunugaagu ma aadaysaan Maxkamada markale. Haddii PAO gu eedaymo kusoo oogo cunuga, garsooraha ayaa kuu sheegaaya markaad joogto Dhagaysiga Shaacinta Eedaymaha. Inta lagu jiro dhagaysiga imaatinka koobaad, waxaad maqli kartaa Qareenka Dacwad Oogista oo garsooraha kala hadlaaya taariikhaha eedaymaha lasoo jeediyay ama xog ku saabsan "eedaymo boobsiis ah."

# Dhagaysiyada Dheeraadka ah

Haddii **PAO** doorto inuu eedaymo kusoo oogo cunuga, cunugaaga waxaa loo mudayn doonaa **dhagaysiyo dheeraad ah**. Dhagaysiyada cunugaagu ka qaybgeli karo waxaa kamid ah:

## Shaacinta Eedaymaha

Arraignment (Shaacinta Eedaymaha) waa marka garsooruhu u sheegaayo cunugaaga waxa Qareenka Dacwad Oogistu ku eedaynayso. Danbiyada yaryar, shaacinta eedaymaha ayaa lagu samaynayaa ardaaga maxkamada ayadoo cunugaaga iyo qareenkiisa difaacu joogaan. Markay yihiin dabiyo culus, shaacinta eedaymaha waxaa lagu samaynayaa qolka maxkamada. Inta badan dadku "waa inkiraan danbiga." Dhagaysiga xiga, "Dhagaysiga Dajinta Kiiska" ayaa la mudayn doonaa.

## Dajinta Kiiska

Case Setting Hearing (Dhagaysiga Dajinta Kiiska) waa kulan u dhaxeeya cunugaaga iyo qareenkiisa difaaca kaasoo ka dhacaaya qolka sugitaanka ee maxkamada. Qareenka difaaca ayaa inta badan la hadli doona cunugaaga kaligiis inta lagu jiro kulanka. Ujeedada kulankaan ayaa ah in cunugaaga iyo qareenka difaacaaya ay ka doodaan kiiska uuna qareenka difaacu kala taliyo cunugaaga dookhyada uu haysto uuna ka caawiyo cunugaaga go'aansiga dookha haboon.

Cunugaaga, markuu caawimaad ka helo qareenka difaaca, ayaa go'aansan doona inuu danbiga qirto iyo in kale, dacwad mudaysto, ama dib loo dhigo dhagaysiga si uu diyaar garoow dheeraad ah u sameeyo. Ayadoo ku xiran go'aankaan, qareenka dacwada ayaa mudayn doona taariikhda dacwada la qaadaayo, taariikhda cusub ee kiis dajinta ama taariikhda qirashada danbiga.

Dhagaysiyada Dajinta Kiiska ayaa badanaa "lasii wadaa", taasoo ay codsan karaan labada dhinac midkii raba. Inta badan, difaaca wakiilka ka ah carruurta ayaa go'aaminaaya siiwadista garsooruhuna amar ayuu ku baxshaa haddii la isku raaco. Marka ay jirto "continuance (sii wadis)", qasab maaha in adigga iyo cunugaagu uma baahnidiin inaad timaadaan.

## Kartida

"Competency (Kartida)" waxay ka dhigan tahay in cunugaagu uu fahmaayo hanaanka maxkamada uuna awoodo inuu ka caawiyo qareenkiisa difaacu inuu difaaco. Dhagaysiga kartida ayaa la mudeeyaa marka garsooruhu go'aansho haddii cunugaagu "karti" u leeyahay in la maxkamadeeyo. Cunugaaga lama maxkamadayn karo haddii uusan lahayn karti ku filan. Haddii aan cunugaagu lahayn karti, cunugaaga ayaa loo diri karaa isbitaalka dhimirka si uu u noqdo mid karti leh. Sidoo kale, garsooraha ayaa ka laaban kara kiiska, taasoo macnaheedu yahay inaysan jiri doonin wax dacwad ah ama eedaymo ah oo ka dhan ah cunugaaga.

## Omnibus (Dhagaysiga xaqiiqo raadinta)

Dhagaysigaan ayaa loo adeegsanayaa in loogu diyaar garoobo dacwada "xaqiiqo raadinta ah". Kan waxaa caadiyan la qabtaa asbuuca kahoreeya maalinta maxkamada. Inta lagu jiro dhagaysigaan, dacwad oogaha iyo qareenka difaaca ayaa u sheegaaya garsooraha haddii uu diyaar u yahay inuu aado dacwada. Haddii qareenadu u baahan yihiin inay hawl dheeraad ah qabtaan si ay ugu diyaar garoobaan dacwada, garsooraha ayaa dib u dhigi kara dacwad qaadista. Haddii qareenadu diyaar u yihiin dacwad qaadista, waxay siin doonaan garsooraha xogta uu u baahan yahay si uu u qaado dacwada. Garsooraha ayaa sidoo kale xalin doona ciladaha horay u jiray ee u baahan in go'aan laga gaaro kahor inta aan dacwada la qaadin.

## Dacwada/Dhagaysiga Xaqiiqo Raadinta

"Fact-Finding Hearing (Dhagaysiga Xaqiiqo Raadinta)" ama Trial (Dacwada) waa dhagaysi la qabto marka garsooruhu go'aansho in cunugaagu danbiile yahay ama uusan danbi lahayn. Ma jiraan codayn garsoorayaal maxkamada carruurta; natiijada waxaa go'aansha garsooraha. Si garsooruhu u go'aansho in cunugaagu danbilee yahay iyo in kale, qareenka dacwada ku oogaaya waa inuu keenaa caddayn ku filan si uu u muujiyo "beyond a reasonable doubt (Si aan shaki ku jirin)" in cunugaagu galay danbiga. Haddii cunugaaga lagu helo danbiga, dhagaysiga xiga ayaa noqon doona "Dhagaysiga Heshiiska xukun Qaadashada".

## Dhagaysiga Heshiiska/Codsiga

Labadaan dhagaysi ayaa badanaa la iskudaraa. Inta lagu jiro “Plea Hearing (Dhagaysiga Qiraalka)”, cunuga iyo qareenka waxaa loo keenaa eedaymaha dhabta ah ee ay ka wadahadleen ayna isku raaceen Qareenka Difaaca iyo Dacwad oogistu. Kadibna cunuga ayaa si rasmi ah u qiranaaya eedaymaha.

“Disposition (Heshiiska xukun qaadashada)” ee nidaamka sharciga maxkamada carruurta ayaa la mid ah “Sentencing (Xukumid)” marka la joogo nidaamka dadka waawayn. Inta lagu jiro disposition hearing (Dhagaysiga Heshiiska xukun Qaadashada), Dacwad oogaha, Qareenka Difaacaaya cunuga, iyo JPC ga ayaa mid kasta soo jeedinayaa talooyinkiisa. Cunuga, masuulka ayaa sidoo kale soo jeedinaaya fikirkooda. Kama danbaystii garsooraha ayaa xukunka ridaaya (xukun). Amarka Heshiiska Xukunka ayaa sheegaaya waxa cunugaaga ay tahay inuu sameeyo si uu qaab guul leh ugu dhamaysto hanaanka sharciga maxkamada carruurta. Qareenka ayaa ka fakaraaya waxa uu u arko inuu ka caawinaayo cunugaaga barashada isla xisaabtanka, waxa dhawraaya badqabka bulshada iyo waxa ka caawinaaya cunugaaga inuu kobciyo dabeecadiisa. Tusaalayaasha waxaa ku jira muraaqayb, talo siin, adeegga bulshada, magdhawga (dib u bixinta lacagta), iyo waqti uu xabsiga ku qaato. Haddii aan cunugaagu raacin xeerarka ku jira amarka xukun qaadashada, cunugaaga ayay qasab ku noqon kartaa inuu u tago garsooraha mar kale waxa uuna ku amri karaa ganaaxyo cusub. Shaqaalaha maxkamada ayaa siin doona cunugaaga koobiga amarka xukun fulinta kadib dhagaysiga Heshiiska xukun qaadashada.

## Magdhaw

Haddii garsooruhu amro in cunugaagu dhiibo lacag restitution (magdhaw ah) (dib u bixinta qiimaha danbiga uu galay), garsooraha ayaa muddayn kara dhagaysiga magdhawga. Dhagaysigaan waa midka uu garsooruhu ku go'aansho cadadka lacagta cunugaagu dib u bixin doono. Maxkamada ayaa leh barnaamijyada shaqada oo ka caawinaaya cunugaaga inuu shaqeeyo si uu u helo lacagta uu u baahan yahay inuu dib u baxsho.

## Wax ka badelka

Haddii cunugaagu jabiyo xeerarka muraaqabada, JPC giisa ayaa muddaynaaya Modification hearing (dhagaysiga Wax ka badalka) oo uu qabanaayo garsooruhu. JPC ga ayaa ku talinaaya waxa garsooraha ay tahay inuu ka badelo amarka xukunka lagu riday cunugaaga.

## Dib u eegista Xabsi Dhigista

Inta lagu jiro Detention Review (Dib u eegista Xabsi Dhigista), Garsooraha ayaa ka fiirsanaaya awooda masuuliyadeed ee cunuga. Cunuga/Qareenkiisa, Dacwad oogaha, ama JPC ga ayaa codsan kara in la badalo xaalada xabsi ee cunuga. Garsoorayaasha ayaa u wareegi kara EHM, ama xabsi ammaan leh. Taas badalkeed, garsooraha ayaa cunuga kasoo wareejin kara xabsi la waardiyeeyo una wareejin kara EHM ama in la siidaayo.

# DHAGAYSIYADA AAN BADANAA DHICHIN

## Dhagaysiga Kartida



- Garsooraha ayaa go'aaminaaya haddii cunugaagu awoodo inuu
  - ☐ fahmo kiiskiisa
  - ☐ fahmo hanaanka maxkamada
  - ☐ caawin karo qareenkiisa




## Dib u eegista Xabsi Dhigista

- Dhammaan dhinacyada ayaa isku imaanaaya si loo go'aansho in cunugaagu galaayo
  - ☐ Laga siinaynaayo xabsiga
  - ☐ Xabsi la dhigaayo
  - ☐ Lagu xiraayo ama laga furaayo aalada muraaqabaynta guriga ee elektarooniga ah

## Dhagaysiga Billoowga

- Waxaa loo adeegsadaa diyaar garoowga dhagaysiga xaqiiqo raadinta



- Dacwad oogaha iyo Qareenka Difaaca ayaa u sheegaaya Garsooraha haddii ay diyaar u yihiin in cunugu xabsi galo

# Diversions (Wareejinada)

Haddii booliisku u dhiibay soo jeedin **PAO**, PAO ayaa go'aaminaaya in la raaco hanaanka marinka sharciga caadiga ah ee Maxkamada, ama in cunuga loo gudbiyo barnaamij kale. Barnaamijyadaan kale ayaa cunuga kula xisaabtamaaya ficiladiisa inta la xalinaayo waxa keenay habdhaqankiisa kuna dhex haynaaya bulshadiisa. Barnaamijyadaan waxay kaashadaan ururada bulshada iyo shaqsiyaad si ay u taageeraan carruurta iyo qoysaska.

Barnaamijyadaan ayaa caadiyan kaliya adeeg siiya carruurta lagu eedeeyay danbiyada ama anshax darada fudud, laakiin King County waxay ka shaqaynaysaa balaarinta barnaamijyo dheeraad ah oo loo samaynaayo carruurta lagu eedeeyay inay danbiyo adag galeen. Hoos waxaa ku qoran tusaalayaasha barnaamijyadaan.

**Family Intervention and Restorative Services (FIRS, Adeegyada Caawimaada iyo Dhaqan celinta ee Qoyska)** – Waa barnaamij fududeeya kulanada dhaqan celinta oo ku xira talo bixin qoysaska saamayntu kasoo gaartay rabshada qoyska ee carruurta. Xarun bixisa daryeelka daryeelayaasha ayaa diyaar u ah xaaladaha badqabka qoysasku khatarta ku jiraan. Wixii xog dheeraad ah, ka fiiri bogga 11.

**Juvenile Probation Counselor Diversion (Wareejinta La taliyaha Muraaqabaynta Maxkamada Carruurta)** – Mararka qaar, marka uu u qalmo wareejin, PAO iyo JPC yada ayaa siiya cunuga fursad uu uga fogaado eedaymo rasmi ah haddii uu si buuxda u buuxiyo heshiis uu uga qaybgalaayo barnaamij gaar ah ama loogu samaynaayo caawimaada caafimaadka dhimirka.

**Community Accountability Boards (CABs, Gudiyada Isla Xisaabtanka Bulshada)** – Danbiyada ayaa loo gudbiyaa CABs oo ah gudiyo ka kooban mutadawiciinta bulshada oo la kulma cunuga kadibna sameeya qorshayaal ayagoo kaashanaaya xubnaha qoyska cunuga iyo adeeg bixiyaasha bulshada si cunugu u buuxsho qorshayaashaas. **Choose 180** – Waa urur bulsho oo bixiya wareejin hormaris ah, aqoon korosi nus maalin ah oo loo sameeyay inuu noqdo aalad lagu fahmo dookhyada cunugu gaaro oona looga caawiyo cunuga inuu ka baxo dacwada maxkamada carruurta. Marka si buuxdo loo sameeyo aqoon kororsiga, ka qaybgalayaashu waxay helayaan in dacwadooda sharci la baabi'iyo.

# Barnaamijyada iyo Iskaashiyada Taageerada leh ee Maxkamada

Adeegyada Maxkamada Carruurta ee King County ayaa iskaashi la samaysa tiro badan oo ururada bulshada iyo xubnaha bulshada kamid ah si loogu xiro carruurta iyo qoysaska khadka barnaamijyo bixiya taageero, caawimaad, iyo tababar. Aasaaska shaqadaan ayaa ku dhisan mabaadii'da dhaqan celinta, taasoo adkaynaysa baahida loo qabo dayactirka waxyeelada iyo dhisida xariirada bulshada. Tani waa qayb kamid ah mabaadii'da hagaysa farsamooyinka qaabka aan uga falcelinayno habdhaqanka carruurta. Iskaashiyada bulshada iyo barnaamijyada ayaa muhiim u ah caawinta carruurta maxkamadu ku furan tahay inay ku xirnaadaan ayna la shaqeeyaan bulshada. Haddii aad xiisaynayso inaad la shaqayso Maxkamada Carrurta, fadlan la xariir Robert Gant, oo ah Maareeyaha Iskaashiga Bulshada (206) 477-0041 rgant@kingcounty.gov

Barta Youth Support Resources (Ilaha Taageerada Carruurta) ayaa bixisa xog ku saabsan khayraadka carruurta iyo qoysaska ku dhaqan King County. Khayraadka waxaa lagu kala miiri karaa nooca adeegga, da'da, iyo badka safarka. Si aad u gasho barta Ilaha Taageerada Carruurta guji halkaan. Haddii aad doonayso inaad kudarto ama wax ka badesho xogta ku jirta kaydka ishaan fadlan iimeel udir SCResourceCenter@kingcounty.gov.

## Jawaabta Caafimaadka Dhimirka (BHR):

Behavioral Health Response (BHR, Jawaabta Caafimaadka Dhimirka): Yoolka iskaashiga BHR Maxkamada Sare ee BHR waa in loo adeego carruurta qaba baahiyaha caafimaadka dhimirka (ayna ku jiraan kuwa soo maray naxdinta iyo xanuunka lamaan) oo lagu xukumay rabshad xun ama waajahaaya xukunka heerka dhexe ee Maxkamada Carruurta. Ayadoo la adeegsanaayo hanaankaan, carruurta waxaa taageeri doona La taliyaha Muraaqabaynta ee Maxkamada Carruurta (JPC) iyo hage kasocda urur bulsho. Carruurta ka qaybgala ayaa awoodi doona in eedaymahooda la yareeyo lagana dhigo kuwo anshax xumo ayadoo la siinaayo dookha Xukun Fudud ama in xukunka laga cafiyo markay tijaabada loo diro buuxiyaan. Sabab la xariirta in qaabkaan uu baxsho xukunka adeegga bulshada iyo hoos u dhigida eedaynta, dacwad oogaha ayaa ka qaybgeli doona aqoonsiga carruurta u qalma barnaamijkaan.

## Aggression Replacement Training (ART, Tababarka Badalida Xanaaqa) (206) 477-9573

Barnaamij Maxkadeed oo loo gudbiyo carruurta kaasoo balaarsha isdhexgalka, maaraynta dareenka iyo xirfadaha habdhaqanka ee ka qaybgalayaasha. Waxaa jiro saddex qaybood oo manhajku leeyahay kuwaasoo diirada saaraaya Dhisida Xirfada, Maaraynta Xanaaqa, iyo Wax sababaynta Mooraalka. Xiisadaha 1 saac ah ayaa la qabtaa saddex jeer asbuucii muddo 10 asbuuc ah oo wadarta guud noqonayso 30 saacadood.

## Dahlinta Khatarta Ku jirta (ARY), Carruurta U baahan Adeegyada (CHINS), iyo Barnaamijyada Googoosaysnimada

Barnaamijyadaan waxaa maamusho Maxkamada Qoyska, taasoo ah waax kamid ah Maxkamada Sare kana duwan waaxda muraaqabaynta. Barnaamijyada ARY/CHINS waxay ka caawiyaan waalidiinta ka walaacsan habdhaqanka cunugooda iyo badqabka doonaayana inay caawimaad ka helaan Maxkamada si ay u dhawraan badqabka cunugooda. Barnaamijka Googoysnimada waxaa abuurta degmada dugsiga (sida uu amraayo sharciga gobalku) waxaana loogu talagalay inuu iskaashi la sameeyo qoysaska si loogu cesho carruurta wadada ka guul gaarista qorshaha waxbarashada kaasoo ku haboon higsiyadooda waxbarashada.

**At Risk Youth Petition (ARY, Dacwada Carruurta Khatarta ku jirta):**

Waalid/masuul ayaa gudbin kara Dacwada ARY si uu caawinaad iyo taageero uga helo maxkamada si uu u joogteeyo daryeelka, masuuliyada iyo maamulka cunuga loogana caawiyo xalinta khilaafka qoyska. Maxkamada ayaa amri karta cunuga inuu raaco xeerarka lagana diiwaan gasho adeegyada. Maareeyaasha kiiska ayaa taageeraaya qoysaska una gudbinaaya barnaamijyada si loo adkeeyo dib u heshiisiinta. Si loo bilaabo hanaanka, waalidka/masuulku waa inuu kasoo qaataa Family Assessment (Qiimaynta Qoyska) Waaxda Carruurta Dhallinta iyo Qoysaska oo lagala xariiri karo (800) 609-8764.

Fadlan la xariir maareeyaha kiiska si aad u hesho xog dheeraad ah ama booqo https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/becca/ary.aspx :

Qolka Maxkamada ee King County ee Seattle – Maareeyaha kiiska (206) 477-4946
Waxa uu ka shaqeeyaa Degmooyinka Dugsiga ee Bellevue, Issaquah, Lake Washington, Mercer Island, Northshore, Riverview, Seattle, Shoreline, Skykomish, Snoqualmie, iyo Vashon

Xarunta Caddaalada Gobalka ee Maleng oo ku taala Kent - Maareeyaha Kiiska (206) 477-2759
Waxa uu u shaqeeyaa Degmooyinka dugsiga ee Auburn, Enumclaw, Federal Way, Highline, Kent, Renton, Tahoma, iyo Tukwila

**Child in Need of Services (CHINS, Carruurta U baahan Adeegyada)**:

Dacwada CHINS waxaa gudbin kara waalidka/masuulka, cunuga ama **DCYF**. Haddii uu jiro khilaaf xun oo aan la xalin karin inta cunugu guriga ku nool yahay, maxkamada ayaa oggolaan karta in illaa 6 bilood si ku meel gaar ah cunuga loo geeyo meel guriga ka baxsan inta qoysku ka shaqaynaayo dib u midoobidooda.

Si loo bilaabo hanaanka, waalidka/masuulku ama cunugu waa inuu kasoo qaataa Qiimaynta Qoyska Waaxda Carruurta Dhallinta iyo Qoysaska oo lagala xariiri karo (800) 609-8764.

Fadlan la xariir maareeyaha kiiska si aad u hesho xog dheeraad ah ama booqo https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/becca/chins.aspx :

Qolka Maxkamada ee King County ee Seattle – Maareeyaha kiiska (206) 477-4946
Waxa uu ka shaqeeyaa Degmooyinka Dugsiga ee Bellevue, Issaquah, Lake Washington, Mercer Island, Northshore, Riverview, Seattle, Shoreline, Skykomish, Snoqualmie, iyo Vashon

Xarunta Caddaalada Gobalka ee Maleng oo ku taala Kent - Maareeyaha Kiiska (206) 477-2759
Waxa uu u shaqeeyaa Degmooyinka dugsiga ee Auburn, Enumclaw, Federal Way, Highline, Kent, Renton, Tahoma, iyo Tukwila

## Truancy & Education Reengagement (Dib U nidaaminta Googoysnimada iyo Waxbarashada)

Gudaha Gobolka Washington, degmooyinka dugsiga sharciga ayaa ka doonaaya inay gudbiyaan "Truancy Petition (Dacwada Googoysnimada)" ayna u gudbiyaan maxkamada ugu danbayn markuu sameeyo maqnaanshaha todobaad ee bilaa sababta ah bil gudaheed ama ugu danbayn maqnaanshaha tobnaad ee aan sababta lahayn sanad gudihiis (RCW 28A.225.030). Dacwada Googoysnimadu waa dacwad madani ah taasoo loogu talagalay in ardayda dib loogu celiyo waxbarashadooda. Sharciga ayaa sidoo kale doonaayo in degmada dugsigu iskudaydo gacansiin si ay u caawiso baabi'inta ama yareynta maqnaanshiyaasha bilaa sababta ah.

Gudaha King County, yoolka Hanaanka Dib u falgelinta Googoysnimada iyo Waxbarashadu waa in lagala shaqeeyo degmooyinka dugsiga iyo qoysaska in meesha laga saaro caqabadaha ku gudban xaadirista dugsiga ee caadiga ah ayadoo la xaqiijinaayo in carruurtu haystaan waxay u baahan yihiin si ay guul uga gaarana dugsiga. Maxkamada ayaa go'aaminaysa haddii cunugu u baahan yahay inuu yimaado maxkamada kadib Dacwada Googoysnimada ee lagusoo oogay. Kahor intaan la dajin dhagaysiga maxkamada, cunuga iyo qoysaska ayaa lagu casuumayaa tiro taageerooyinka qoyska ah oo adeegsada adeegyada wacdiga, diinta, iyo qaabka dhaqan celinta si dib loogu hago waxbarashada. Kooxda Dib ugu celinta Waxbarashada ayaa ku dadaalaysa in natiijooyin wanaagsan la helo ayadoo carruurta yaryar ka fogaynaaya hanaanka dacwada googoysnimada ee maxkamada rasmiga ah looguna badalaayo iskaashiyada bulshada oo la kordhiyo, tababarada dib ugu laabashada waxbarashada, u doodista xaquuqda dhalinta, u gudbinta adeegyada bulshada, iyo barnaamijyada kale ee waxbarashada. Arimaha la xariira googoysnimada waxaa sidoo kale maamula Gudigga Googoysnimada ee Bulshada ee heer degmo.

**Iskuduwaha Maxkamada Becca ee King County:** (206) 477-2746

**Barnaamijka Googoysnimada ee Maxkmada Sare ee King County:** (206) 477-2746

Waxaad la xariiri kartaa degmada dugsigaaga si aad u hesho xog dheeraad ah aadna u hesho xogta lagala xariiraayo barnaamijka googoysnimada ee degmadaada halkaan:

https://www.k12.wa.us/student-success/support-programs/attendance-chronic-absenteeism-and-truancy/district-truancy-liaison

**Xogta lagala Xariiraayo Wakiilada Degmada:** https://www.k12.wa.us/student-success/support-programs/attendance-chronic-absenteeism-and-truancy/district-truancy-liaison

**Ku xigeenka Qareenka Dacwad Oogista:** Miiska (206) 477-4336 | Taleefanka gacanta (206) 965-5614

**Ma doonaysaa Fursadaha Waxbarashada oo Gaar ah?** Dib u hel Fursad: https://reopp.org/

## Kooxda Qiimaynta Caddaalada Maxkamada Carruurta (JJAT) (206) 263-1522

Juvenile Justice Assessment Team (JJAT, Kooxda Qiimaynta Cadaalada Maxkamada Carruurta) waxay siiyaan adeegyada caafimaadka dhimirka, adeegsiga maandooriyaha, iyo baaritaanka dhimirka iyo talooyin carruurta maxkamadu ku furan tahay si looga caawiyo abuurista iyo hagida qorshaha daawaynta dhimirka. JJAT waa iskaashi u dhaxeeya iskaashatada caafimaadka dhimirka ee bulshada (Ryther iyo Seneca Family of Agencies) iyo Maxkamada Carruurta ee King County. Ryther iyo Seneca ayaa baxsha shaqaale qandaraas ku jira oo sameeya qiimaynada caafimaadka ee carruurta.

JJAT waxaa ka tirsan koox iskudhafan oo xirfadlayaasha caafimaadka dhimirka ah, uuna ku jiro dhakhtarka caafimaadka dhimirka, dhakhaatiirta maskaxda, iyo xirfadlayaasha xanuunka adeegsiga maandooriyaasha, oo bixiya qiimayn, talo bixin, iyo soo jeedino ku aadan caawimaadaha baxnaaninta. Kooxda JJAT waxaa sidoo kale ka tirsan Kormeeraha JJAT, Iskuduwaha Barnaamijka, iyo Iskaashade ka socda Qoyska. Qiimeeyaasha JJAT ayaa cunuga kula kulmaaya xafiiska, bulshada, ama xabsiga marar badan inta loo baahdo si loo helo sawirka buuxa ee baahiyaha hadda ee cunuga

## Xarunta Khayraadka Maxkamada Sare ee Carruurta iyo Qoyska

Xariirada macnaha leh, ku salaysan bulshada ee carruurta ayaa muhiim u ah guushooda. Xarunta Khayraadka ee Bobbe J. Bridge ayaa gacan ka gaysata xaqiijinta in carruurta iyo qoysasku ay helaan xogta, barnaamijyada, iyo fursadaha taageeraaya baahiyahooda iyo higsiyadooda. Xarunta Khayraadku waxay kaashataa ururada khayriga ah iyo xubnaha bulshada si loo baxsho caawimaad abaabulan oo la siiyo carruurta iyo qoysaska ayadoo lagu bixinaayo hal goob oo dhexe kuna taala Xarunta Cadaalada Carruurta iyo Qoyska. Saacadaha ay shaqayso Xarunta Khayraadku waa Isniinta illaa Jimcada inta u dhaxaysa 8:30am iyo 4:30pm. Qof kasta ayaa heli kara adeegyada inta lagu jiro waqtiyadaan. Si aad ula xariirto wac (206) 263-8634.

Xarunta Khayraadka ayaa leh **Clothing Shop (Dukaanka Dharka)**, oo ah xarun dukaanka dharka ah, oo carruurtu ka iibsan karaan dhar bilaash ah, oo habaysan, cusub ama la isticmaalay si ay ugu xidhaan waraysiga xiga ee shaqada, kahortagida maxkamada, xaflada abaal marinta, qalin jabinta, ama munaasabadaha kale ee qaaska ah. Guji halkaan si aad xog badan uga ogaato Dukaanka Dharka.

## Tababarka Waxbarashada iyo Shaqada ee Maxkamada Carruurta (206) 477-3020

Education and Employment Training (EET, Tababarka Waxbarashada iyo Shaqada ee Maxkamada Carruurta) ayaa bixiya taageerada guusha waxbarashada, Tababarka U diyaar Garoowga Shaqada, iyo khibrada shaqada nidaamsan oo la siiyo carruurta u qalma ee maxkadu ku furan tahay. EET ayaa ka caawisa carruurta maxkamadu ku furan tahay, ee da'doodu u dhaxayso 15-19, inay guul ka gaaraan waxbarashada iyo guusha shaqada. Khubarada Waxbarashada iyo Shaqada ayaa la shaqeeya carruurta dhammaan King County. EET ayaa aqbalaysa carruurta loosoo gudbiyo lana shaqaynaysa carruurta sanadka oo dhan.

Haddii aad xiisaynayso inaad iska qorto ama laguu gudbiyo EET, fadlan la xariir La taliyaha Muraaqabaynta Maxkamada Carruurta ee loo xilsaaray cunuga si uu u qiimeeyo u qalmida uuna gudbin kuugu sameeyo.

# Qaabab kale ee Badalka U ah Xabsiga

**Muraaqabaynta Guriga ee Elektarooniga ah (206) 477-9915 aka (206) 477-9891**

Marka Maxkamadu walaac ka qabto inaan cunugaagu kusoo laaban doonin maxkamada, cunugaaguna uu ku heli karo taageerada uu u baahan yahay banaanka xabsiga, Maxkamada ayaa cunugaaga gelin karta Muraaqabaynta Guriga ee Elektarooniga ah (EHM). Waxaa la siin doonaa jijinta EHM oo looga xiraayo anqawga si **Department of Adult and Juvenile Detention (DAJD, Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta)** u awoodo inay muraaqabayso meesha uu joogo. Dookhaan waxa uu u sahlayaa cunugaaga inuu sii joogo gurigooda iyo bulshada halkii uu xabsi la ilaalsho ku jiri lahaa.

Haddii cunugaagu ku jiro barnaamijka EHM, waxaad la kulmaysaa shaqaalaha DAJD. Shaqaalaha waxaa ku jira Taqasuslayaasha Meelaynta, kuwaas oo kaa caawinaaya u dajinta cunugaaga EM, kadibna Saraakiisha Muraaqabaynta Bulshada, oo la soconaaya cunuga lagu xiray aalada EHM si ay u hubiyaan inuu raacaayo xeerarka maxkamada uuna ka guul gaaraayo la joogista bulshada. Inta ilmuhu ku jiraan EHM, waxay kaliya aadi karaan goobaha horay loogu fasaxay sida dugsiga, balamaha caafimaadka ama talo bixinta, dhagaysiyada maxkamada, ama balamaha JPC ama Qareenka. Jadwalka cunugaagu waa in laga doodaa ayna ansixiyaan shaqaalaha DAJD.

**Daryeelka Kooxda**

Group Care (Daryeelka Kooxda) waa goob la dagan yahay oo 24 saacadoo furan oo cunugaagu si ku meel gaar ah ugu noolaan karo. Barnaamijkaan waxaa maamuli kara urur bulsho sida YouthCare. Daryeelka Kooxda waxaa la siiyaa carruurta da'doodu u dhaxayso 13-17, cunugaaguna waa inuu aqbalaa inuu ka qaybgalo dhammaan barnaamijyada intuu ku jiro guriga kooxda. Waa suurtagal in cunugaaga lagu xiro Muraaqabaynta Guriga ee Elektarooniga ah intuu ku nool yahay hooyga kooxda. Heerka danbiga loo haysto cunugaaga, iyo habdhaqankiisa hoose intuu ku jiray Daryeelka Kooxda, ayaa samaayn karta awoodiisa ah in lagu daro barnaamijkaan.

# Sajalaynta Diiwaannada

Gudaha Gobolka Washington, dhammaan dacwadaha maxkamada carruurtu waa diiwaan dadwayne. Taasoo ka dhigan in eedaymaha loo haysto cunugaaga ay heli karaan dadwaynuhu. Marka cunugaaga lagu heli danbi asagoo jooga maxkamada carruurta waxaa loogu yeeraa “Adjudication (Xukun fudud)”, kaasoo aan caadiyan ahayn xukun danbiyeed. Hase yeeshee, xukunka Fudud ayaa ku adkayn kara cunugaaga inuu shaqo helo. Ayadoo ku xiran fal danbiyeedyada cunugaagu soo maray, cunugaaga ayaa "xiri kara" diiwaankiisa danbiyada. Tan ayaa ka dhigan in shirkadaha shaqaalaysiinta ee mustaqbalka iyo dadka kale inaysan raadin karin diiwaanka danbiyada ee cunugaaga. Si loo xiro diiwaanadiisa cunugaagu waa inuu gudbiyaa codsi uu u diraayo maxkamada. Wixii xog dheeraad ah oo ku aadan xirista diiwaannada, la xariir Waaxda Dfiaaca ee King County (206) 296-7662.

Waxaa habboon inaad la hadasho qareenkaaga iyo JPC gaaga aadna wax ka waydiiso xaaladaada gaarka ah iyo sida aad caawimaad ugu heli karto xirista diiwaanka.

# Erayada Badanaa La adeegsado

**Adjudication (Xukun fudud)** Go'aan maxkamadeed, oo uu gaaro garsoore, ahna in cunugu galay danbiga lagu eedeeyay.

**Advocate (U doode)** door xirfadeed oo uu leeyahay qof doonaaya xaqiijinta in qof kale awoodo in codkiisa la dhagaysto, in la difaaco lana dhawro xaquuqdiisa, iyo in fikradihiisa iyo waxyaabaha uu doonaayo si sax ah loo tixgeliyo marka go'aanada laga gaaro noloshiisa.

**Anger Replacement Training (Tababarka Dib u Dajinta Xanaaqa)** waa barnaamij bara carruurta abuurista maaraynta dareenkooda iyo xirfadaha hadalka. Waxaa maxkamada dadku ku bara JPC yada halka bulshadana ay ku baraan qaar kamid ah ururada adeegga caafimaadka.

**Arrested (La xiray)** Marka ay booliisku xiraan cunug ama carruur.

**Arraignment (Dhagaysiga Koobaad)** waa dhagaysiga koobaad ee maxkamada oo cunuga eedaysan si rasmi ah loogu sheego eedaymaha loo haysto iyo xaquuqdiisa (qofka eedaysan ayaa galaaya qiraalka aqbalaada ama diidista danbiga)

**Assessment (Qiimayn)** Waa qiimeyn uu sameeyo xirfadle ayadoo la adeegsanaayo waraysi si loo go'aansho baahiyaha cunuga iyo/ama qoyska ayadoo lagu salaynaayo khayraadka la heli karo.

**At Risk Youth Petition (Dacwada Carruurta Khatarta Ku jira)** Waa dacwad ay maxkamada u gudbiyaan waalidka/masuulka ilmaha oo ay ku codsadaan caawimaad laga siiyo sii wadista daryeelka, masuuliyada, iyo maamulka cunugooda, in laga caawiyo xalinta khilaafka ka jira qoyskooda.

**Attorney (Qareen)** ama gar yaqaan, xirfadle sharci oo tababaran oo ruqsad u haysta inuu dadka ku matalo maxkamada.

**Case Manager (Maareeyaha Kiiska)** waxa uu fulin karaa qiimaynada, wuxuu ka taageeri karaa macaamiisha qiimaynta, qorshaynta, u doodista, gudbinta, iyo isku xirka adeegyada.

**Charge (Eedaynta)** Waa sharci caddaynaaya in cunuga lagu eedeeyay inuu jabiyay sharci.

**Children and Family Justice Center (Xarunta Cadaalada Carruurta iyo Qoyska)** Waa dhisme ku yaala 1211 E. Alder Street taasoo Adeegyada Maxkamada Qoyska, Maxkamada Carruurta, PAO, barnaamijyada bulshada iyo munaasabadaha, Xarunta FIRS, iyo xabsiga carruurta intuba ku yaalaan.

**Child in Need of Services (Adeegyada Carruurta Baahida Qaba)** Waa dacwada hanaanka oo uu soo gudbiyo waalid, cunug ama wakiilka DCYF kaasoo ka codsanaaya maxkamada inay cunuga gayso guri aan ahayn kan uu hadda dagan yahay sabab la xariirta dagaal xun.

**Child Protective Services (Adeegyada Difaaca Cunuga)** Waaxda Gobolka Washington oo ka tirsan Waaxda Adeegyada Carruurta iyo Qoyska oo bixisa difaaca carruurta khatarta ugu jira, ama waajahaaya dayaca, xadgudubka jireed, galmo, ama dareen. Diirada waxaa la saarayaa badqabka ilmaha iyo taageerida waalidiinta si loo adkeeyo qoysaska loona hormariyo guryo kobac badbaado leh siinaaya carruurta.

**Civil (Madani)** waa dacwad loo gudbiyo maxkamada oo ku aadan in xubin qoys uusan buuxin masuuliyadiisa sharciga ee ka saarnayd qof kale (una dhaxaysa waalidka iyo carruurta ama kurayda).

**Community Accountability Boards (Gudiyada Isla Xisaabtanka Bulshada)** Gudiyada mutadawiciin bulsho oo la kulmaaya cunuga kadibna qorshe la samaynaaya xubnaha qoyska iyo adeeg bixiyaasha bulshada si cunugu u buuxsho si loo xaliyo xadgudubyada heerka hooseeya.

**Community Empowerment Disposition Alternative Resolution (Xalka Gaarka ah ee Xukunka Ilmaha ee Xoojinta Bulshada)** waa barnaamij ku xiraaya carruurta ilaha adeegyada iyo taageerooyinka kadib marka koobaad ee lagu xukumo danbi. Markuu ka qaybgalo, ilmaha ayaa ka fogaanaayo in xabsi loo taxaabo.

**Conditions of Probation (Shuruudaha Muraaqabaynta)** ayaa kaladuwanaan ilmo kasta ayadoo ku xiran waxa garsooruhu aaminsan yahay inuu sax yahay. Shuruudaha guud ee muraaqabaynta waxaa ku jira aadista dugsiga, dhawrista xeerarka guriga, iyo ka fogaanshaha maandooriyaasha. Mararka qaar garsooraha ayaa amri kara talo bixin ama daawaynta daroogada, adeegga bulshada ama magdhaw lacageed.

**Continuance (Sii wadista)** Dib u dhigista dhagaysiga maxkamada.

**Counsel (La taliye)** Magaca kale ee qareenka ama gar yaqaanka.

**Court (Maxkamada)** waxaa laga wadaa Maxkamada Sare ee King County, gaar ahaana Waaxdeeda Carruurta. Waxaa sidoo kale loogu yeeraa Maxkamada Carruurta.

**Court Order (Amarka Maxkamada)** Amarka sharciga ah ee rasmiga ah oo uu soosaaro Garsoore.

**De-Identification (Ka saarida aqoonsiga qofka xogta)** Hanaanka loo adeegsado kahortaga in aqoonsiga qofka lagu xariiriyo xogta si loo dhawro sirtiisa.

**Department of Children, Youth, and Family Services (Waaxda Adeegyada Carruurta, Dhalinta, iyo Qoyska)** wakaalad heer gobal oo ka shaqaysa fayaqabka carruurta iyo dhalinta ku dhaqan Gobolka Washington taasoo bixisa qorshe loogu talagalay adeegyada taageerada qoysaska laguna hubinaayo badqabka iyo faya dhawrka carruurta.

**Dependency (Ku tiirsanaan)** Waa nidaam maamula masuul ka noqoshada cunug.

**Detained (Xabsi la dhigay)** Lagu hayo xabsi la waardiyeeyo.

**Disposition (Heshiiska nooca xukunka)** Nidaamka caddaalada carruurta ee xukunka maxkamada (garsoore ayaa go'aaminaaya heshiiska nooca xukunka).

**Diversion (Wareejin)** Fursad lagu maamulaayo arinta maxkamada carruurta oo kabaxsan hanaanka maxkamada iyo xabsiga la waardiyeeyo.

**Due Process (Dacwad Furan)** Waa qasab in maxkamadu raacdo hanaan caddaalad iyo sinaan leh; tusaale, waa inay siiyaan carruurta ogaysiiska dhagaysiyada iyo xaqa ay u leeyihiin inay doodooda dhiibtaan.

**Evidence-Based Program (Barnaamijyada Ku salaysan Cadaynta)** barnaamijyada daawaynta ee sida taxadarka leh loo daraaseeyay oo leh cilmi baaris caddaynaysa waxtarkooda. Waxaa ku jira ART, FFT, MST, iyo FIT.

**Family Court Services (Adeegyada Maxkamada Qoyska)** Xafiisyada maxkamada ee maamula qaadashada ilmo aadan dhalin, qorshayaasha waalidka, rabshada qoyska, iyo barnaamijyada Becca: ARY, CHINS iyo Googoysnimada.

**Felony (Danbiilenimo)** Fal ama danbi xun oo keenaaya ciqaabta xabsi dheer ama xabsiga carruurta. Ka fiiri JR (danbiyada fudud waxaa loogu yeeraa xukun qafiif ah).

**File charges (Dacwad Oogid)** Shaacinta rasmiga ah ee ah in Qareenka Dacwad oogisru uu dacwad kusoo oogaayo si ilmo loogu ciqaabo danbi. Dhagaysiga ayaa dhici doona caddaynta ayaana lagusoo oogi doonaa cunugaaga.

**First Appearance Hearing (Dhagaysiga Imaatinka Koobaad)** Dhagaysi la qabto kadib marka cunuga la keeno xabsiga garsooruhu go'aansado in maxkadu ay awood sharci leedahay, ayadoo lagu salaynaayo caddayn la hayo, si loosii wado dacwadaha ka dhanka ah cunuga.

**Functional Family Therapy (FFT, Baxnaaninta Shaqo ee Qoyska)** Barnaamij muddo kooban, oo qoyska u adeegga laguna bixiyo guriga oo baxsha kahortag iyo caawimaad la siiyo carruurta khatarta wayn ku jira ee da'doodu u dhaxayso 11-18.

**Guardian (Masuulka ilmaha)** Qof wayn oo leh xaqa sharciga ah ee gaarista go'aanada iyo daryeelka quseeya ilmo. Masuulka ilmaha ayaa noqon kara waalidka ilmaha, xubin katirsan qoyska, qof wayn oon qaraabo la ahayn, ama gobalka.

**Grievance (Cabashada)** Bayaan rasmi ah oo ku aadan in qof loola dhaqmay si khaldan oo caddaalad daro ah

**Hearing (Dhagaysi)** Kulanada maxkamada ayaa ka dhici kara qolka sugitaanka ee maxkamada ayadoo uu joogo qareenku ama qolka maxkamada horta garsooraha.

**Jurisdiction (Awooda Sharciga)** Awooda maxkamada ee dhagaysiga iyo go'aaminta kiis ka dhan ah cunug.

**Juvenile (Carruur)** Qof kasta oo ku jira da'da carruurnimada ee sedeed iyo toban sano.

**Juvenile Justice Assessment Team (Kooxda Qiimaynta Cadaalada Carruurta)** Kooxda qiimeynta ku salaysan maxkamada oo bixiya qiimayno ku aadan carruurta maxkamadu ku furan tahay.

**Juvenile Detention Officer (Sarkaalka Xabisga Carruurta)** Shaqsiyaadka ka shaqeeya xabsiga la ilaaliyo oo masuul ka ah abuurista iyo dhawrista goob badqab u leh carruurta iyo xaqiijinta in daryeelkooda iyo baahiyahooda barnaamijka la buuxsho.

**Juvenile Probation Counselor (La taliyaha Muraaqabaynta Maxkamada Carruurta)** Xirfadle u shaqeeya Maxkamada Sare oo loo xilsaaro carruurta qirta danbiga ama ay Maxkamadu ku heshay danbi. Waxay abuurayaan qorshe kiis ayagoo kaashanaaya cunuga iyo xubnaha qoyskiisa waxayna siiyaan Garoosraha xogta ku saabsan cunuga. Yoolka koobaad ee la taliyaasha dabagalka danbiyadu waa inay taageeraan cunugaaga iyo qoyskaaga inta lagu jiro hanaanka ayagoo bixinaaya khayraad korna u qaadaaya badqabka iyo caafimaadka mustaqbalka.

**Juvenile Rehabilitation (JR, Baxnaaninta Carruurta)** waa adeeg ka tirsan DCYF waxa uuna u adeeggaa carruurta Gobolka Washington ee khatarta sare ku jira. Carruurta ayaa loo qaban karaa masuul JR ka socda waxaana u qabanaysa maxkamada carruurta ee degmada. Maxkamada carruurta ayaa raacaysa tilmaamaha xukunka la riday si loo go'aansho cunuga lagu qoondaynaayo JR. Carruurtaan ayaa caadiyan lagu xukumaa danbiyo heerar kaladuwan ama galay danbi wayn.

**Law Enforcement (Sharci Fulinta)** Saraakiisha booliiska oo shaqadoodu tahay fulinta sharciga. Gudaha King County, waaxda Nabadgalyada ayaa la heshiisa magaalooyinka maxaliga ah iyo maamulada magaalooyinka si loo bixiyo adeegyada sharci fulinta.

**Mandated Reporter (Wariye Qasban)** waa qof kaasoo, sabab la xariirta shaqadiisa, sharciyan laga doonaayo inuu soo sheego xadgudub ama dayac kasta oo looga shakiyay in ilmo loo gaysanaayo uuna u sheego Adeegyada Difaaca Carruurta. Qareennada Difaaca iyo Taqasuslayaasha Dhexdhexaadinta qasab **kuma** ahan inay soo wargeliyaan adeegyada.

**Mentor (Tababare)** Hage xirfadle ah oo hagid iyo taageerid ka siiya carruurta xoojintooda.

**Misdemeanor (Xukun fudud)** Waa fal danbiyeed fudud oo ka fudud danbiga danbiilaha wayn.

**Multi-Systemic Therapy (Baxnaanin nidaamyo badan)** Baxnaaninta adag, ee guriga lagu bixiyo ee qoyska oo la siiyo carruurta da'doodu u dhaxayso 12-17 ee qaba ciladaha habdhaqanka ee aadka u daran.

**Offense (Fal danbiyeed)** Fal haddii uu galo qof wayn loo arki lahaa danbi.

**Parent (Waalid)** Sida ku qoran xogtaan, erayga"masuulka ilmaha" iyo "waalid" waa isku macne.

**Plea Bargain (Gorgortanka Qirashada)** Marka qareenka cunuga iyo dacwad ooguhu ay sameeyaan heshiis lagu xalinaayo eedayn danbi; caadiyana cunuga ayaa aqbala inuu qirto danbiga si uu ugu badasho yaraynta tirada ama darnaanta xukunka lagu ridaayo.

**Probable Cause (Sabab Macquul ah)** Sabab lagu aamino in cunug galay danbiga lagu eedeeyay

**Probation (Muraaqabayn)** Carruur uu garsoore gashay muraaqabayn waxaa qiimeeyaa La taliyaasha Muraaqabaynta Caddaalada (JPC) si loo go'aansho heerka kormeerka loo baahan yahay loona xaqiijiyo in dhammaan shuruudaha amarka maxkamada la buuxiyay adeegyada ku haboona la siiyay cunuga iyo qoyskiisa.

**Prosecution (Dacwad oogista)** Hanaanka keenista qofka maxkamada si loogu oogo eedaymaha danbiga.

**Prosecutor (Dacwad Ooge)** Qareenka King County kaasoo kusoo ooga eedaysanaha carruurta ah danbi siina wada inuu helo xukun lagu rido cunuga.

**Public Defender (Difaacaha Bulshada)** Qareen ka tirsan King County oo ay maxkamadu u magacawday inuu matalo eedaysane carruur ah kaasoo aan awoodin inuu shaqaalaysiiyo qareen.

**Recidivism (Dacwo soo laalaabtay)** Xukunada danbiyada ee soo noqnoqda.

**Referral (Gudbin)** Markay soo gudbinayaan sharci fulintu, waa warbixin ay soo gudbinayaan booliisku. Markay tahay "gudbin loo gudbinaayo adeegyada" ayadoo wakiil laga yahay JPC ama adeeg bixiyaha, waa soo jeedin lagu raadinaayo caawimaad ama taageero.

**Respondent (Eedaysane)** Cunug kayar da'da xukunka maxkamada carruurta oo ku eedaysan jabinta sharci federaal, gobal ama magaalo.

**Restitution (Magdhawga)** Lacag la siiyo dhibanaha

**Statute (Xeer)** Sharci ay ansixiyeen ama dhaqan gasheen sharci dajinta gobalka Washington.

**Subpoena (Waraaq dacwadeed)** Dukumiinti sharci oo ku amraaya qofka magaciisa lagu sheegay inuu yimaado taariikhda iyo waqtiga la cayimay maxkamad la cayimay si uu kiis cadayn uga bixiyo.

**Superior Court (Maxkamada Sare)** Waxay kormeertaa muraaqabaynta cunuga, adeegyada maxkamada, maxkamada qoyska, karaaniyada, iyo shaqaalaha taageerada.

**Testimony (Marag kac)** Bayaan la sameeyo si loo caddeeyo xaqiiqo ama xaqiiqooyin laguna dhaarto.

**Truant (Googoys)** Cunug ama dhalin yaro shan jeer oon la fasixin u gooyay dugsiga hal bil ama 10 jeer hal sanad dugsiyeed.

**Truancy Petition (Dacwada Googoysnimada)** Dacwada Googoysnimada oo dugsiyadu gudbiyaan waa dacwad madani ah taasoo loogu talagalay in ardayda dib loogu celiyo waxbarashadooda.

**Undocumented (Aan sharci haysan)** shardi sharci oo ku xiran ku noolaanshaha Maraykanka ayadoon kormeer iyo fasax laga qaadanayn dawlada Maraykanka kaasoo wadanka kusoo galay fiiso sharci ah kaasoo aan hadda shaqaynayn.

**Warrant (Amarka soo xirida)** dukumiinti uu soo saaray sarkaal sharci ama dawladeed oo amraaya booliiska inay xiraan ama qaadaan ilmo yar oo geeyaan meel gaar ah.

# Erayada Lasoo Gaabiyay

“acronym (erayada lasoo gaabshay)” waa qaabka lasoo gaabshay ee eray. Kuwaan waxaa badanaa adeegsada dadka ka shaqeeya nidaamka sharciga ah. Hoos waxaad ka helaysaa liiska erayada ugu badan ee la adeegsado.

**ART** Aggression Replacement Therapy (Baxnaaninta Badalida Xanaaqa)

**ARY** At Risk Youth (Carruur Khatar ku jira), waa barnaamij lagu sameeyo dacwada madaniga ah. Ka fiiri qaybta "Dacwada Carruurta Khatarta ku jirta" ee "qeexitaannada".

**CABs** Community Accountability Boards (Gudiyada Isla Xisaabtanka Bulshada)

**CEDAR** Community Empowered Disposition Alternative and Resolution (Xalka iyo Xukun Kale ee Xoojinta Bulshada)

**CFJC** Children and Family Justice Center (Xarunta Caddaalada Carruurta iyo Qoyska)

**CHINS** Dacwada Child in Need of Services (Carruurta u Baahan Adeegyada). Arag “Carruurta u Baahan Adeegyada” ee “qeexitaannada”

**CPS** Child Protective Services (Adeegyada Difaaca Carruurta) oo ay maamusho Waaxda Carruurta Kurayda iyo Qoysaska

**DAJD** King County Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta)

**DCYF** ga Gobolka Washington Department of Children Youth and Families (Waaxda Carruurta Kurayda iyo Qoysaska)

**DPD King County** Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadwaynaha ee King County)

**DSHS** ga Gobolka Washington Department of Social and Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada)

**EBP** Evidence Based Program (Barnaamij Caddayn Ku salaysan)

**FFT** Functional Family Therapy (Baxnaaninta Shaqada ee Qoyska)

**FIRS** Family Intervention and Restorative Services Center (Xarunta Adeegyada Gacan siinta iyo Baxnaaninta ee Qoyska)

**JPC** Juvenile Probation Counselor (La taliyaha Muraaqaynta Carruurta)

**JJAT** Juvenile Justice Assessment Team (Kooxda Qiimaynta Caddaalada Maxkamada Carruurta)

**JR** Juvenile Rehabilitation (Baxnaaninta Carruurta)

**MST** MultiSystemic Therapy (Baxnaanin Nidaamyo Badan)

**PAO** Prosecuting Attorney’s Office (Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista)

# Ilaha iyo Adeegyada Bulshada

Hoos waxaa ku qoran qaar kamid ah barnaamijyada bixiya adeegyada la siiyo carruurta iyo qoysaska ku dhaqan King County. Haddii aad heli karto interneet, waxaa lagu talinayaa inaad la tashato kaydka xogta la cusboonaysiiyay adoo gujinaaya halkaan ama booqanaaya https://youthresources.kingcounty.gov/

**4Culture** (206) 296-7580
101 Prefontaine Pl S Seattle, WA 98104
Carruurta ay maxkamadu ku furan tahay ayaa sameeya farshaxan oo baranaaya xirfado uu siinaayo tababare ayadoo la siinaayo casharo muddo 16 asbuuc ah. Diirad ayaa la saarayaa yaraynta kaladuwanaanshaha isirka ee nidaamka sharciga carruurta.

**Alive and Free (Markasta la heli karo ahna Bilaash)** (206) 749-7550
2100 24th Avenue South, Suite 250, Seattle, WA 98144
Tababarka kahortaga rabshada ee carruurta ku jira burcada, rabshada, iyo nidaamka cadaalada carruurta.

**Asian Counseling and Referral Services (Adeegyada Talo Bixinta iyo Gudbinta ee Aasiyaanka)** (206) 695-7600
3639 Martin Luther King Jr. Way S. Seattle, WA 98114
Adeegyada luuqada Aasiyaanka, qiimaynada, baxnaaninta qofka, kooxda, iyo qoyska, maaraynta kiiska, gurmadka aafada, adeegyada dhimirka iyo daawooyinka. Kooxaha wiilasha Koonfur Bari Aasiya, barnaamijka rabshada shukaansiga kurayda, kahortaga isticmaalka maandooriyaha, waxbarashada, caawimaada dhaqaale ee waxbarashada, shaqada, casharada gaarka ah, adeegga bulshada, iyo nashaadaadka dalxiiska.

**Center for Human Services (Xarunta Adeegyada Bulshada)** (206) 362-7282
2 aag oo katirsan Shoreline
Talo bixin, casharada waalidnimada oo ku baxaaya Isbaanish, adeegyada isticmaalka maandooriyaha, iyo dharka, helitaanka kumbuyuutarka, boonooyinka timajaraha, taageerooyinka waalidka saqiirka. Daryeelka carruurta ayaa la heli karaa inta waalidku qaadanaayo qaar kamid ah adeegyada laga bixiyo Shoreline.

**Centro Rendú** (253) 499-4245
St. Vincent DePaul, Kent, Burien, iyo Renton
Adeegyo la siiyo bulshooyinka ku hadla Latinx, Isbaanish. Xirfadaha waalidnimada ee hore, casharada waxbarashada aasaasiga ah, GED, aqoonta kumbuyuutarka iyo dhaqaalaha, maaraynta kiiska, carruurta iyo maaraynta kiiska, burcada, rabshada, iyo kahortaga daroogada iyo adeegyada caawimaada ee dugsiyada iyo wakaaladaha iskaashiga laleh. Adeegyada Soo galootiga.

**Changes Parent Support Network (Isbadalada Ururka Taageerada Waalidka)** (888) 468-2620
Discovery House, 4401 2nd Ave NE, Seattle
Barnaamij nidaamsan, oo ay hogaanshaan dadka isla dhibaatooyinka soo maray oo taageero siiya waalidiinta la daalaa dhacaaya carruurta samaynaaya habdhaqanada mucaradada iyo burburinta naftooda. Changes ayaa siiya rajo, caawimaad, taageero iyo gurmad ku aadan dareemida cakirnaan iyo kalinimo. Kulanka Seattle ayaa kulan qabanaaya Arbacooyinka, 7:00-9:30 p.m. Waxay leeyihiin nidaam lagu qabto kulanka Arbcada koobaad ee bil kasta 6:00 p.m.

**Children's Crisis Outreach Response System (CCORS, Nidaamka Jawaab celinta Iskuxirka Carruurta Dhibaataysan)** 206-461-3222
Adeegyada masiibada ee qoysaska waajahaaya rabshada, carruurta waajahaaya dhibaatooyinka dhimirka ama dareenka, iyo marka cunug uu khatar degdeg ah ugu jiro in laga saaro guriguu daganaa.

**Choose 180** (206) 457-8940
1416 SW 151st ST Burien 98166
Wuxuu bixiyaa tababar, u doodis, fursado shaqo, tababarada shaqada ee xagaaga, iyo taageerada waxbarashada.

**Commercially and Sexually Exploited Children (Carruurta Ganacsi ahaan iyo Galmo Ahaan La sasabtay)** (206) 205-9534 Xafiiska ama (206) 601-5563 Taleefanka gacanta
Adeegyada Carruurta iyo dhalinta waajahaaya ama khatarta ugu jira inay waajahaan sasabasho ganacsi ama galmo iyo shaqsiyaadka iyo qoysaska daryeelka siiya carruurtaas.

**Community Passageways (Marinada Bulshada)**
7728 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118
Waxay bixisaa tababar, u doodis, xirfadaha nolosha, daawayn ku salaysan isir, u doodista xeerka, iyo gaadiidka carruurta iyo waalidiinta doorka ku leh nidaamka caddaalada carruurta.

**Community Psychiatric Clinic (Caafimaadka Dhimirka Bulshada)** (206) 366-3015
Goobaha Kaladuwan ee Xafiiska wayn: 4319 Stone Way N Seattle, WA 98103
Garab siinta, talo bixinta bukaan socodka, qiimaynada, baxnaaninta shaqsiga, taageerada waalidka, baxnaaninta qoyska, kooxaha xirfad dhisida, iyo adeegyada maaraynta kiiska.

**Consejo Counseling and Referral Services (Adeegyada Talo Bixinta iyo Gudbinta ee Consejo)** (206) 461-4880
Goobaha Kaladuwan ee Xafiiska wayn: 3808 S Angeline Street Seattle, WA 98118
Adeegyada Latinx, carruurta khatarta wayn ku jira iyo qoysaskooda sida burcada, rabshada, iyo kahortaga iyo caawimaada isticmaalka maandooriyaha, casharada gaarka ah, tababarka, nashaadaadka dalxiiska, deeqaha waxbarashada, adeegyada caafimaadka dhimirka ee bukaan socodka, barnaamijka talo bixinta ee dugsiga ku salaysan, kahortaga weerarka galmada dugsiga, farshaxanka muuqaalka iyo fulinta, ityo adeegyada bulshada.

**Credible Messengers (Fariin Sidayaasha Lagu kalsoonaan karo)** (206) 981-1190 (253) 335-6731 iyo (206) 261-2410
Tababarayaasha wadaaga isirka, dhaqanka, iyo asalka dhaqan dhaqaale ee isku mid ah lana noolaa isla dhibaatooyinka cunuga. Xirfadaha nolosha, u doodista, guusha, daawaynta ku salaysan isirka, xoojinta, iyo qorshaynta waxbarashada.

**Crime Victims Compensation (CVC, Magdhawga Dhibanayaasha Danbiga)** (800) 762-3716
Waxa uu magaa qarashka caafimaadka, talo bixinta, iyo mushaarka lumay ee kooban ee dhibanaaya birmagaydada ah ee danbiyada.

**Employment and Education Youth Services (Adeegyada Shaqada iyo Waxbarashada ee Carruurta)** (206) 477-7000
WorkSource Center 645 Andover Park West Tukwila, WA 98188

**Friends of Youth (Saaxiibada Carruurta)** (425) 869-6490
Issaquah
Adeegyada garab istaaga, talo bixinta bukaan socodka, iyo xirfadaha nolosha ee kahortaga hooy la'aanta oo tababar lagu siiyo ardayda dugsiga dhexe, iyo hooyga carruurta.

**Glover Empowerment Mentoring (GEM, Tababarka Xoojinta ee Glover)** (253) 277-2726
827 N Central Ave Suite B-109 Kent, WA 98032
Tababarka Shaqsiga, kooxda, iyo kan dugsiga ku salaysan. Maaraynta kiiska, u doodista, taageerada masiibada, iskuxirka wadada, iyo hagida nidaamyada.

**Greater Maple Valley Community Center (Xarunta Bulshada Greater Maple Valley)** (425) 432-1272
Barnaamijka kahortaga iyo caawimaada kurayda. Barnaamijyo loogu talagalay kurayda fasalada 6$^{aad}$-12$^{aad}$, nashaadaadka dadka isku xaalada soo maray, kahortaga rabshada kurayda, barnaamijyada xagaaga, casharada gaarka ah, adeegyada talo bixinta, iyo adeegyada LGBTQ.

**Guided Pathways Support for Youth and Families (Taageerada Marinada la Hago ee Carruurta iyo Qoysaska)** (253) 236-8264
Laynka Caawimaada Carruurta iyo Qoyska Maalmaha Talaadada iyo Khamiista 9:00am-5:00pm (253) 277-4052
6625 S. 190th St., Suite B108, Kent, WA 98032

Wuxuu bixiyaa taageerada 1-1 ee waalidka ee waalidiinta carruurta qaybta ka ah Nidaamka Daryeelka. Casharada waalidka iyo tababarada adeeg bixiyaasha taageerada waalidka. Taageerada dadka isku xaalada ah ee carrruurta. Munaasabadaha bulshada ee qoyska.

**Harborview Medical Center Traumatic Stress Counseling (Xarunta Talo Bixinta Wlaaca Naxdinta Caafimaadka ee Harborview)** (206) 744-1600 Seattle
(425) 688-5130 Bellevue
Waxay siisaa talo bixin dhibanayaasha dhammaan noocyada rabshada.

**Helping Youth Perform Excellence HYPE (Ka caawinta Carruurta Gaarista Guul)** (253) 740-8198
Federal Way
Barnaamijka dhammaadka asbuuca oo laba asbuucle ah lana siiyo carruurta da'da 14-18 kuwaas oo ku jira ama khatar ugu jira dacwada maxkamada carruurta. Waxay bartaa xirfadaha hogaanka iyo nolosha ee hogaamiyaasha bulshada. Qorshaynta iyo taageerada guusha.

**Horn of Africa (Bariga Afrika)** (206) 760-0550
5303 Rainier Ave. S. Suite D Seattle, WA 98118
Maaraynta Kiiska iyo tababarka u diyaar garoowga shaqada oo ku baxaaya Amharic, Oromiff, Tigrinya, iyo Soomaali. Waxay u adeegtaa soogalootiga Bariga Afrika ee ku dhaqan dhammaan King County.

**The IF Project**
Qeexitaanka

**Journeymen** (206) 429-5203
Vashon Island
Waxay ka faa'iidaysataa khibradaha isbadalka ee wiilasha iyo raga ayadoo la adeegsanaayo akhrisyada dabiiciga ah ee qoraalka iyo tababarka joogtada ah. Kaamamka, aqoon kororsiyada, dib u bixida, iwm.

**Kent Youth and Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee Kent)** (253) 859-0300
232 2nd Ave. S. Ste 201 Kent, WA 98032
Adeegyada caawimaada caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka maandooriyaha, kooxda taageerada ee LGBTQ iyo isbahaysiga carruurta da'doodu tahay 13-19, iskuxirka carruurta iyo barnaamijyada dugsiga kadib, iyo kahortaga hooy la'aanta.

**King County Sexual Assault Resource Center (KCSARC, Xarunta Khayraadka Weerarka Galmada King County)**
(425) 226-5062
Laynka Gurmadka Masiibada oo shaqeeya 24-Saac (888) 998-6423
200 Mill Avenue South, Suite 10 Renton, WA 98057
Wuxuu siiyaa baxnaanin, u doodis, difaac sharci, taageero qoys, iyo adeegyada taageerada aafada la siiyo dadka waajahay weerarka galmada. Waxay sidoo kale baxshaan adeegyo ku baxa af Isbaanish.

**King County Wraparound WISE** (206) 263-8957 ama (206) 263-9006
Hanaanka ku salaysan kooxda ee carruurta qaba baahiyaha kaladuwan iyo qoysaskooda oo loo sameeyay in laga caawiyo kor u qaadista natiijada carruurta.

**Xarumaha Waxbarashada**
Shoreline Community College (206) 533-6733
Seattle Vocational Institute (206) 934-4439

Waxay u adeegtaa carruurta da'doodu u dhaxayso 16-24 ee aan dhamayn dugsiga sare laakiin doonaaya inay qaataan GED ayna aadaan kuleej, tababar farsamo, iyo/ama shaqo. U doodista waxbarashada iyo maaraynta kiiska.

**Mentoring Urban Students and Teens (M.U.S.T., Tababarida Ardayda iyo Kurayda Magaalada)** (206) 949-7444
4093 Letitia Ave S. Seattle, WA 98118
Tababaraha ardayda kuleejka ee mushaarka qaata ee dhalinta u dhaxaysa fasalka 8aad illaa dugsiga sare kana socda dugsiyada ku yaala Rainier valley.

**Mercer Island Youth and Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska)**
Talo bixinta dugsiga iyo baxnaaninta bukaan socodka qoyska.

**National Suicide Prevention Lifeline (Laynka Nolosha ee Kahortaga Ismiidaaminta ee Qaran)** (800) 273-8255 TTY (800) 799-4889
Laynka tooska ah wuxuu bixiyaa 24/7, taageero bilaash ah oo qarsoodi ah lana siiyo dadka ku jira walaaca, ilaha kahortaga iyo masiibada ee naftaada iyo ehelkaaga.

**Navos** (206) 248-8826
Goobo kaladuwan. Xafiiska wayn: 2600 SW Holden Street, Seattle, WA 98126
Xarunta caafimaadka bukaan jiifka iyo bukaan socodka, adeegyada ku salaysan guriga, iyo dugsiga ee caafimaadka dhimirka carruurta.

**Neighborhood House (Guriga Xaafada)** (206) 461-8430
Goobo ku yaala Seattle iyo Auburn
Barnaamijyada dugsiga kadib, xaruntada Ilaha Bulshada ee dadka dagan High Point, iyo Adeegyada Shaqada iyo Waxbarashada ee Carruurta

**North Shore Youth and Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee North Shore)** (425) 485-6541
19201 120th Ave. NE Ste 108 Bothell, WA 98011
Casharada caafimaadka dhimirka, talo bixinta maandooriyaha, waalidnimada, iyo barnaamijyada taageerada dugsiga.

**Open Doors for Multicultural Families (Albaab U furida Qoysaska Dhaqanada Badan)** (253) 216-4479
24437 Russell Rd., Suite # 110 Kent, WA 98032
Waxay taageerooyin siisaa carruurta iyo qoysaska carruurta iyo dhalinta naafada ah ee ku hadla luuqadaha kaladuwan. Aqoon kororsiyada hormarinta xirfada ee ku haboon dhaqanka ee carruurta iyo waalidiinta, kooxaha taageerada, u diyaar garoowga shaqada, xirfadaha nolosha, kahortaga hooy la'aanta, u doodista, hagida nidaamka, nashaadaadka dalxiiska, iwm.

**Parent for Parent (Waalid caawinaaya Waalidka kale)** (206) 477-2311
**Superior Court (Maxkamada Sare), Seattle and Maleng Regional Justice Center (Xarunta Cadaalada Gobalka ee Seattle iyo Maleng, Kent**
Maxkamada Sare waxay bixisaa barnaamij ka caawinaaya qoysaska carruurtooda laga saaray daryeelkooda ayna ka saareen Adeegyada Difaaca Carruurta (CPS) ama carruurtoodu guriga ku tiirsan yihiin. Waxay ku xirtaa "Parent Allies (Isbahaysiyada Waalidka)" (waalidiin si guul leh uga gudbay nidaamka ku tiirsanaanta carruurta) waalidiinta ku cusub nidaamka. Isbahaysiga Waalidka ayaa bixisa taageero iyo caawimaad la siiyo waalidiinta ku cusub nidaamka si ay u fahmaan waxa ay qasab tahay inay sameeyaan si ay qaab guul leh dib ula midoobaan ilmahooda.

Barnaamijka ayaa ka kooban saddex qaybood oo waawayn: Taageerada Isbahaysiga Waalidka ee Dhagaysiyada Maxkamada Carruurta, cashar waxbarasho labo saac ah oo loo yaqano Dependency 101 (Ku tiirsanaanta 101), iyo casharka taageerada joogtada ah ee loo yaqanao Dependency 201 (Ku tiirsanaanta 201).

**Positive Outcomes Program (Barnaamijka Natiijada Wanaagsan)** (253) 838-6810
Federal Way
Barnaamijka dhalinta oo taageerada ardayda ka qalin jabisa dugsi sare ama qaadanaaya GED, iska qoraaya kuleej ama barnaamij tababar, raadsanaaya shaqo, raadsanaaya ilaha sida gaadiidka, agabka dugsiga, dharka, guriga, ama cuntada, iyo inay ka qaybgalaan nashaadaad wanaagsan.

**Powerful Voices (Codadka Xooga badan)** (206) 860-1026
1620 18th Ave. Ste. 100 Seattle, WA 98122
Barnaamijyada dugsiga iyo xagaaga, barnaamijyada kobcinta dhaqanka, barnaamijyada shaqada, iyo kobcinta u doodista haweenka la aqoonsaday iyo carruurta jinsi ahaan aan lab iyo dhedig midna ahayn.

**Puget Sound Adlerian Society** (206) 527-2566
Wuxuu bixiyaa koorso bilaash ah oo 14 saac ah oo lagu baxsho Anshaxa Wanaagsan ee Waalidnimada wuxuuna abaabulaa Munaasabada Kalaandarka Waalidnimada oo oonleen ah, iyo sidoo kale iskuduwayaasha kale iyo waxbarashada waalidnimada ee ururada iyo xogta koorsooyinka tababarka ee laga baxsho aagaga bartamaha Puget Sound.

**Reconnect to Opportunity (Dib Ugu xirmida Fursada)** (206) 263-8244
Iskuxirka guriga si loo bixiyo adeegyada ku xirida waxbarashada ee carruurta inta u dhaxaysa da'aha 16 iyo 24. Taageerooyinka xirfada sidoo kale.

**Renton Area Youth & Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee aaga Renton)** (425) 271-5600 ama (206) 772-2050
1025 South 3rd St. Renton, WA 98057 iyo 12704 76th Ave. S. Seattle, WA 98178
Caafimaadka qoyska iyo talo bixinta caafimaadka dhimirka. Maaraynta kiiska iyo kahortaga ee carruurta khatarta ku jira laguna bixiyo Barnaamijka SPARK T.H.I.S..

**Ryther** (206) 525-5050
2400 NE 95th St. Seattle, WA 98115
Baxnaaninta iyo talo siinta carruurta iyo daawaynta iyo xirfadaha carruurta qaba autismka iyo kuwa laga helay Attention-deficit/hyperactivity disorder (ADHD, Xanuunada la xariira feejignaan la'aanta). Qiimaynada isticmaalka maandooriyaha iyo caawimaadaha carruurta.

**SafeFutures Youth Center (Xarunta Carruurta ee SafeFutures)** (206) 938-9606
6337 35th Ave. SW Seattle, WA 98126
Barnaamijyada Kahortaga iyo caawimaada ee dhaqanka ku habboon ee carruurta khatarta ugu jira inay qayb ka noqdaan nidaamka maxkamadaha iyo carruurta hadda maxkamadaha saaran. Xafiiskoodu waxa uu ku yaalaa Galbeedka Seattle laakiin waxay adeegyo ku baxshaan dhammaan Degmada King County. Waxay gacan ka gaystaan wada shaqaynta dugsiga, tababarka, u doodista, maaraynta kiiska, iyo baahiyaha ilaha kale.

**SeaMar**
Goobo Kaladuwan
Waxay adeegyada ku baxshaan Ingiriis iyo Isbaanish. Barnaamijka guusha waxbarashada ee Latinx. Maaraynta adag ee kiiska, dib ula shaqaynta dugsiga, talobixinta daroogada/khamriga, talo bixinta qoyska, adeegyada caafimaadka iyo taageerada guriyaynta ee carruurta ku lugta leh nidaamka cadaalada carruurta, ardayda dugsiga dhexe ee khatarta ugu jira in dugsiga laga cayrsho, iyo kuwa saamayntu kasoo gaartay rabshada ka jirta deegaankooda. Carruurta ayaa sidoo kale helaaya caawimaada shaqada, fursadaha barashada dugsiga sare kadib, iyo fursadaha adeegga bulshada.

**Seattle Children's (Caruurta Seattle)** (206) 987-2000
4800 Sand Point Way NE Seattle, WA
Casharada waalidka iyo kooxaha taageerada, tababarka hormarinta kurayda ee dadka waawayn, talo bixinta dadka isku xaalada ah, khayraadka waxbarashada. Taageerada qoysaska carruurta naafada ah.

**Sound** (206) 901-2000
6400 Southcenter Blvd. Tukwila, WA 98188
Adeegyada taageerada carruurta. Adeegyada bukaan socodka, bulshada, iyo kuwa dugsiga lagu baxsho. Xirfadaha waalidnimada, shaqsiga, kooxda, lamaanaha, iyo baxnaaninta qoyska. Qiimeynada, maaraynta kiiska, gurmadka aafada, adeegyada dhimirka, iyo taageerada shaqada iyo hooyga. Iskaashatada waalidka iyo la taliyaasha dadka isku xaalada ah. Adeegyo qaas u ah dadka ay saamayntu kasoo gaartay naxdinta iyo carruurta autismka qaba.

**Southeast Youth & Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee Koonfur Bari)** (206) 721-5542
3722 South Hudson Street Seattle, WA 98118
Barnaamijyada talo bixinta, hormarinta carruurta, iyo hormarinta dhalinta. Casharada bulshada iyo nolol dhisida, nashaadaadka dhaqanka iyo dalxiiska iyo taageerada tacliinta. Taageerada qoyska iyo waalidka sida maareynta kiiska iyo talo bixinta. Barnaamijka iskuxirka Afrikaanka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha (maaraynta kiiska, caawimaada shaqada iyo la qabsiga dhaqanka iyo tababarka). Barnaamijka iskuxirka iyo Taageerada Aasiyaanka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha ayaa bixiya talo bixin, u doodis, xog iyo gudbinta iyo caawimaada masiibada iyo sidoo kale maaraynta kiiska, caawimaada shaqada iyo kobcinta iyo tababarka dhaqanka. Adeegyada tujumaada iyo fasiraada ayaa la baxshaa.

**Southwest Youth & Family Service (Adeegyada Qoyska iyo Carruurta ee Koonfur Galbeed)** (206) 937-7680
4555 Delridge Way SW Seattle, WA 98106
Baxnaaninta Carruurta iyo qoyska ee gaarka ah, midda kooxda, iyo tan qoyska. Mustaqbalo Cusub, farshaxan, barnaamijka kahortaga rabshada carruurta, adeegyada taageerada, wuxuu bixiyaa u doodis iyo maaraynta kiiska, barnaamijka manhajka ka baxsan, barnaamijyada xagaaga, iyo nashaadaadka dalxiiska.

**Substance Abuse Hotline (Laynka Isticmaalka Maandooriyaasha)** (800) 662-4357
Adeegga gudbinta iyo xogta ee oo shaqeeya 24/7, 365 maalmood sanadkii (oo ku baxa Ingiriis iyo Isbaanish) lana siiyo shaqsiyaadka iyo qoysaska waajahaaya xanuunada dhimirka iyo/ama isticmaalka maandooriyaha.

**Suicide Crisis Text Line (Laynka Fariimaha Aafada Ismiidaaminta)**
Caawimaad ayaa la heli karaa 24 saacadood maalintii dhammaan Maraykanka adoo fariin qoraal u dirayaa erayga START lambarkaan 741741. Qofka fariinta qoraalka ah soo diraaya waxaa toos loogu xirayaa Crisis Counselor (La taliyaha Masiibada), oo u tababaran inuu dadka ka gudbiyo xiliga aafada uuna siiyo jawi dagan asagoo siinaaya dhagaysi furan iyo xalinta cilada si iskaashi leh.

**TeamChild** (206) 322-2444
1225 S. Weller Ste 420 Seattle, WA 98144
Xarumaha Diiwaan xirista ee ku yaala Seattle iyo Kent. U doodista sharciga ah ee caqabadaha nidaamka sida tacliinta, guriyeynta, korinta ilmaha, baahiyaha daryeelka caafimaadka ee aan la buuxin, caawimaada iyo taageerada nidaamka caafimaadka.

**Teen Clinics by Seattle and King County Public Health (Xarumaha Carruurta ee Waaxda Caafimaadka ee Seattle iyo King County)**
Auburn, Eastbay, Federal Way, Kent
Adeegyada bilaashka ah iyo kuwa qiimaha jaban ee carruurta da'doodu gaartay illaa 21 sano jir. Cinjirka galmada oo bilaash ah, qaababka xakamaynta dhalamada, STD ga iyo baaritaannada HIV ga, Qorshaha B (subixii kadib markaad kaniiniga cunto), baaritaannada uurka, iyo xog ku saabsan caafimaadka galmada.

**Teen Link** (866) 833-6546
Caawimaad qarsoon oo lagu bixinaayo taleefanka lana siinaayo kurayda. Fiidkii 6:00pm- 10:00pm.

**TXT 4 HELP** 44357
Adeegga taageerada fariin qoraalka ee wadanka oo dhan, oo 24 saac shaqeeya looguna talagalay carruurta ku jira dhibaatada. Waxaa loo adeegsan karaa in taageero ama badqab lagu raadsado sabab la xariirta xadgudub, xoog sheegasho, dhibaatooyinka qoyska, walaaca, fikradaha ismiidaaminta, iyo kuwo kale. La taliyaasha TXT 4 HELP ayaa bixin kara taageero lagu bixinaayo fariin qoraalka, kuna siin kara talooyin dheeraad ah oo ku aadan caawimaad degdeg ah. Fariin qoraal ugudir erayga “safe” iyo ciwaankaaga hadda (ciwaanka, magaalada, gobalka) una dir 4HELP (44357). Sikino gudahood, waxaad heli doontaa fariin kuu sheegaysa meesha kuugu dhaw Safe Place (Goobta Amaanka ah) iyo lambarka taleefanka wakaalada dhalinta ee maxaliga ah. Si aad u hesho caawimaad degdeg ah, ku jawaab “2chat” si aad fariin qoraal ugula hadasho la taliye tababaran.

**Therapeutic Health Services (THS, Adeegyada Caafimaadka Baxnaaninta)** (206) 323-0930
Goobo Kaladuwan
Adeegyada caawimaada, isticmaalka maandooriyaha iyo barnaamijyada iyo adeegyada caafimaadka dhimirka, Kooxda Tababarka Waalidka ee Isbaanishka ee 5 asbuuc ee carruurta qaba xanuunada kaladuwan. Adeegyada dugsiga lagu bixiyo oo lagu baxsho Dugsiga Dhexe ee Madrona iyo Dugsiga Sare ee Garfield sida qiimaynta goobta lagu baxsho, caawimaada aafada, talo bixinta shaqsiga iyo kooxda, rabshada iyo caawimaada burcada/kahortaga, iskuxirka khayraadka, iyo casharka xirfadaha nolosha ee dhalinta asalkoodu Afrikaanka yahay.

**Urban Artworks (Shaqooyinka Farshaxanka Magaalada)**
Inscape Arts Building 815 Seattle Blvd S Ste B7 Seattle, WA 98134
Barnaamijka dugsiga kadib iyo shaqo baradka, barnaamijka shaqada, barnaamijka xagaaga, ilaaliyaha, barnaamijka tababarka. Iskaashadaha barnaamijka EET ee carruurta dacwadu ku socoto.

**Urban Impact (Saamaynta Magaalada)** (206) 722-2052
7728 Rainier Ave. S Seattle, WA 98118
Hooyada kaladuwan ee Seattle ku yaala ee Degmada Bartamaha laga bilaabo illaa White Center oo bixiya casharada gaarka ah ee ardayda soo galootiga, taageerooyinka qoyska qaxootiga ah, tababarka, taageerada dugsiga kadib, wada shaqaynta aabaha, iyo iskuxirka dugsiga sare.

**Urban League of Metropolitan Seattle (Isbahaysiga Magaalada ee Bartamaha Seattle)** (206) 461-3792
105 14th Ave. Ste 200 Seattle, WA 98122
Waxbarashada, guriyeynta, taageerada shaqada, barnaamijyada xoojinta carruurta, iyo nashaadaadka xirfadlayaasha da'yarta ah.

**Valley Cities Counseling and Consultation (Talada iyo Talo Bixinta Magaalooyinka Dooxada)** (253) 833-7444
Goobo kaladuwan

**Vashon Youth and Family Services (Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee Vashon)** (206) 463-5511
20110 Vashon HWY SW Vashon, WA 98070
Maaraynta kiiska, tali bixinta, adeegyada isticmaalka maandooriyaha, caawimaada khayraadka, kaydka cuntada, adeegyada caafimaadka dhimirka, u doodista, kahortaga hooy la'aanta, nolosha la kaabo, adeegyada haweenka uurka leh, adeegyada waalidnimada, adeegyada iskuxirka Latinx, iyo adeegyada kahortaga rabshada.

**Victim Support Services (Adeegyada Taageerada Dhibanaha)** (800) 346-7555 (Laynka Caawimaada 24-Saac shaqeeya)
Oo Horay loogu yeeri jiray Families & Friends of Violent Crime Victims (Qoysaska iyo Saaxiibada Dhibanayaasha Danbiyada Hubaysan). Waxay bixisaa adeegyada taageerada ku salaysan bulshada oo la siiyo dhibanayaasha dhammaan noocyada danbiga.

**Washington Recovery Help Line (Laynka Gurmadka ee Soo kabashada Washinton)** (866) 789-1511
Taageerada dareenka iyo gudbinta 24 saac ah ee isticmaalka maandooriyaha, cilada khamaarka iyo caafimaadka dhimirka.

**YMCA (Ururka Dhalinta Kiristaanka ah ahna Nimanka)**
Goobo Kaladuwan
Adeegyada dhalinta iyo carruurta oo ay ku jiraan hooyga iyo qorshaynta kalaguurka, waxbarashada shaqada, taageerada qoyska iyo daryeelka korinta carruurta, talo siinta iyo baxnaaninta, hormarinta hogaaminta, iyo kahortaga rabshada.

**You Grow Girl (Waxaad tahay Gabadh Kortay)** (206) 417-9904
2200 Rainier Ave S, Suite 201, Seattle, WA 98144
Kaamamka maalintii, kooxaha xirfad dhisida, tababarka xirfada, maaraynta kiiska, talo bixinta qofka, iyo qoyska, waxbarashada cilmi nafsiga, iyo kooxaha taageerada ee carruurta iyo dhalinta da'aha 7 illaa kakor.

**Young Women Empowered (Y We, Haweenka Da'yarta ah ee La Xoojiyay)** (206) 519-2426
2524 16th Avenue S. Suite #301 Seattle, WA 98144
Barnaamijyada Y-WE ee tababarka iyo xoojinta ayaa u adeegga haweenka da'yarta ah, da'aha 13-24, iyo tababarayaasha haweenka waawayn oo ka shaqeeya aaga Seattle wayn. Y-We waxay abuurtaa wadashaqayn macno leh ayadoo la adeegsanaayo barnaamijyada dhaqan ahaan ku habboon ee ay taageeraan tababarayaal.

**YouthCare** (800) 495-7802
Waxa uu bixiyaa barnaamijyada hooyga ee carruurta, hagida nidaamka cadaalada carruurta, kahortaga hooy la'aanta, tababarida, iyo u doodista sasabashada xadgudubka galmada iyo ganacsiga iyo galmada.

**Youth Eastside Services (YES, Adeegyada Carruurta Daanta Bari)** (425) 747-4937
Bellevue, Kirkland, iyo Redmond
Talo bixinta caafimaadka dhimirka ee caddaynta leh, isticmaalka maandooriyaha, talo bixinta iyo daawaynta ciladaha wadajira, adeegyada dhimirka, iyo barnaamijka waxbarashada iyo kahortaga ee carruurta, dhalinta iyo qoysaskooda ku dhaqan Easy King County. Adeegyo lagu bixiyo af Isbaanish.

**Youth and Family Clothing Shop at Juvenile Court (Dukaanka Dharka Carruurta iyo Qoyska ee Maxkamada Carruurta)** (425) 531-1756
1211 E. Alder St. Seattle, WA 98122
Kaydka dharka ee cunug kasta oo u baahan iyo qoysaska lugta ku leh nidaamka maxkamada carruurta.

**YouthSource** (206) 477-7010
Xarun hal meel ku taal oo bixisa barnaamijyo badan oo la siiyo dhalinyarada da'daha 16 illaa 24 ee ka baxay dugsi sare. Barnaamijyadaan waxay diirada saaraan waxbarashada, shaqada ito hormarinta hogaaminta. Waxay sidoo kale siiyaa xariiro barnaamijyada dhalinta, ilaha bulshada ee dajinta nolosha, adeegyada u diyaar garoowga shaqada iyo meelaynta, iyo maaraynta kiiska balaaran.

## Qiraalo

**Macluumaad lagasoo qaatay "**King County Juvenile Justice Resource Booklet (Buug Gacmeedka Isha Cadaalada Carruurta ee King County)" oo ay samaysay Juvenile Justice 101 (Cadaalada Carruurta), "A Family Guide to Pennsylvania's Juvenile Justice System (Tusmada Qoyska oo ku Socota Nidaamka Cadaalada Carruurta ee Pennsylvania) oo ay abuurtay Family Involvement Committee of the Pennsylvania Council of Chief Juvenile Probation Officers (Saraakiisha Muraaqabada Madaxa Gudiga Cadaalada Carruurta ee Gudigga Wada shaqaynta ee Pennsylvania)" iyo Parents of Incarcerated Children Bill of Rights (Xaquuqaha Sharciga ee Carruurta Waalidku Maamulo) oo kasoo baxday Texas Juvenile Justice Division (Waaxda Caddaalada Carruurta ee Texas).

**Zero Youth Detention (ZYD, Baabi'inta Xabsi Dhigista Dhalinta) waxay uga mahadcelinaysaa dhinacyada soo socda bixinta saacadaha aan xisaabta lahayn ee dib u eegista, talada, iyo fikiradaha:** Adeegyada Maxkamada Sare ee Caddaalada Carruurta ee King County, Waaxda Difaaca Bulshada ee King County, Xafiiska Qareenka Dacwad Oogista ee King County, Xafiiska Shaqada, Xeelada iyo Miisaaniyada, Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee King County iyo Seattle, Waaxda Xabsi Dhigista Dadka waawayn iyo Carruurta ee King County, Best Starts for Kids, Waaxda Caafimaadka Dhimirka iyo Soo kabashada ee King County, Gudigga Qoyska iyo Carruurta ee King County, Anita Asphy, Shalynn Coleman, Christal Fields, Alrick Hollingsworth, Karisa Morikawa, John Rogers, LaTonya Rogers, iyo Lynette Todd. Farshaxanka muuqda ee ay sameeyeen Maketa Wilborn iyo Mari Shibuya.

**Xog ku saabsan tusmadaa**n si aad jawaab celin uga bixiso ama su'aal nooga waydiiso tusmadaan, fadlan la xariir zydinfo@kingcounty.gov. Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan Baabi'inta Xabsi Dhigista Carruurta, booqo zeroyouthdetention.com.